120

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJKA

# SAYNIS

## FASALKA SADDEXAAD

## 3



F.A.

# SAYNIS

## FASALKA SADDEXAAD

# 3

**Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya**
**Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta**
**XAFIISKA MANAHIJTA**

# X U S

**Buuggan waxanu ku Sharrifaynaa kuna Xusaynaa JAALLE MAXAMED XASAN AADAN (GAHAYR)**

Xoghayihii Wasaaradda Waxbarashada (6dii Diisembar 1974 ilaa 23dii Febraayo).

Jaalle Gahayr wuxu geeriyooday isaga oo fidinaya aqoonta Ummadda Soomaaliyeed.

Gahayr iskuma uu koobin xafiisyadii uu hayey hawlahooda oo keli ah. Isaga oo guta xilkaa weyn ee saarnaa ayuu, haddana, ku darsan jirey shaqooyin kale oo fara badan.

Gahayr wuxu ka soo qayb qaatay samaynta ujeeddooyinka waxbarashada, dejinta manaahijta, qoraalka kutubta dugsiyada iyo xulidda qalabka waxbarashada.

Haddaba, waxaanu si gaar ah ugu xusaynaa buugagga Sayniska oo uu ama qoraalkooda qayb libaax ka qaatay, ama manhajka ay ku dhisan yihiin dejintiisa uu wax ku lahaa.

**Buuggan lama daabacan karo**
**iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta**
**laga helin oggolaansho**

**Waxaa lagu daabacay**
**Wakaaladda Madbacadda Qaranka**
**XAMAR 1975**

# HORDHAC

Buuggan waxa loogu talagalay ardayda dhigata Fasalka saddexaad ee Dugsiyada Baraymariga ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya. Waxa uu la xiriiraa labada buug ee sayniska ah ee loo dejiyey fasalka koowaad iyo kan labaad ee dugsiyada baraymriga.

Buuggan waxa ku yaalla dhacdooyin badan oo saynis ah oo la doonayo in ardaygu barto; hase ahaatee, ujeeddada weyn ee laga leeyahay buuggani waxay tahay, inuu ardayga ku abuuro xirfad uu degaankiisa ku fiirsan karo kuna baadhi karo. taasna waxa keliya ee uu ku gadhi karaa isaga oo mar walba, iyo meel walba ku, sameeya tijaabooyinka faraha badan ee buugga ku yaalla.

Buuggan waxa la socda buug kale oo koobaya oo la yiraahdo «Saynis: Tilmaame Bare Saddexaad» looguna talagalay macallinka. Waxa markaa macallinka la farayaa in uu buuggaa si weyn uga faa'iideysto si ay ugu fududaato dhigidda buuggani.

In kasta oo buuggan habayntiisa iyo iskudubbaridkiisa aad loogu dadaalay, looguna talagalay in uu kaalin weyn ka galo barashada sayniska ee dugsiyada baraymariga waxa laga yaabaa in aanu noqon ka keliya ee aynu ku kaaftoonno. Sidaa awgeed waxa macallimiinta laga codsanayaa in ay Xafiiska Manaahijta u soo diraan wixii dhalliilo ah ee ay buuggan ku arkaan.

Xafiiska Manaahijtu waxa uu mahad weyn u celinayaa Maxamed Siciid Gees iyo Muuse Xuseen Askar oo buuggan qoray skuna dubbariday; Cabdillaahi Riyaale iyo Idiris Maxamuud oo sawirrada u sameeyey iyo dadkii buuggan gaaracay oo dhan.


**Maamulaha Xafiiska Manaahijta**
**Bashir Faarax Kaahiye**

## DHIRTU WAA AY KORTAA

Fiiri unirta dugsiga hortiisa ku beeran. Ma weynaataa? Waxad aragtaa geedkii yaraa oo weynaaday. Geedku marka uu weynaado waa la hadhsadaa.

Geedkii wuu koray, dhirta oo dhammi waa ay kortaa. Xayawaanku wuu koraa. Noolaha oo dhammi wuu koraa.


Aan fiirinno sida dhirtu u korto.






Dhirta badankeedu waxay ka baxdaa iniinyo ama jirrido. Sawirka waxad ku aragtaa dhir iyo iniinyahood iyo dhir iyo jirridahood.

Dhirtaas ma wada taqaannaa ? qaarkood ma taqaannaa? Iniinyahaas iyo jirridahaas ma taqaannaa ?
Maxay tahay iniintu ?



Marka aad cuntid mafafay ama yaanyo waxad ku aragtaa iniinyo.

Ma taqaannaa waxa iniinta ku guda jira ? Raadi waxa ku jira.




**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay: Iniinyo (digir), sinxi iyo biyo. Iniinyo digir ah ku rid sinxi biyo ku jiraan. Maalin dhan ha ku jireen. Iniinyihii biyaha ka soo saar. Sidan u kala fur iniinta.








Waxa ku guda jira geedkii oo yar, fiiri geedka yar. Iniinta inteeda kale waa cunto. Cuntadaas yaa ku nool ? Waxa ku nool geedka yar. Goorma ayaa geedka yari uu cuntada cunaa ?


Aynu fiirinno. Tijaabadan samay.

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay : iniinyo (digir), sinxi, biyo, xaashiyo iyo bakeeri

Iniinyaha bakeeri biyo ah ku rid. Xaashiyaha biyo ku qoy; dabeedna sinxiga ku rid. Iniinyihii biyaha ku jiray dulsaar xaashiyihii.


Maalin kasta xaashiyaha biyo ku shub. Afar maalmood ka dib, iniinyihii midkood fur. Maxaa dhacay ?






**Afar maalmood ka dibna, iniin kale fur.** Maxaad aragtay ? Afartii **maalmoodba fur iniin.** Fiiri sida geedka yari uu u baxo. Fiiri xididdada, fiiri jirridda iyo caleemaha.

Iniinta marka geed yari ka soo baxo waxa la dhahaa waa ay biqishay. Geedka yari xaggee buu ka helaa cuntada marka uu biqlayo.. Wuxu ka helaa cuntadii ku jirtay iniinta.



# DHIRTU JIRRIDDA AYEY KA BAXDAA

Dhirta qaar ayaa aan iniinyo ka bixin. Waxay ka baxaan jirridda.



Halkan waxad ku aragtaa dhir jirridda ka baxda. Ma taqaannaa dhirtaas. Dhirtaas waxa ka mid ah basasha, baradha-



da iyo muuska.

**Tijaabo :**


Waxad u baahan tahay: Xabbad basal ah. Xabbadda basasha ah kala dillaaci. Fiiri gudaheeda. Xabbad basal ah oo kale beer. Fiiri sida ay u baxdo.

**Tijaabo:**

Waxad u baahan tahay: labo xabbadood oo basal ah; labo bakeeri, biyo, iyo qori findhicil.

Qori findhicilka ka taag basasha. Ha ku libdhin. Basasha dulsaar bakeeriga. Fiiri sawirka. Bekeeriga biyo ka buuxi; ilaa ay soo gaadhaan basasha gunteeda. Maalin kasta biyo ku shub, biyaha yaanu heerkoodu hoos u dhicin. Fiiri waxad aragtid. Fiiri xididdada.

Dhinacee ayey u baxayaan? Caleemuhu dhinacee ayey u baxayaan ?




**Dhirta iyo iniinyuhu biyaha ayey ku baxaan.**


Dhirta iyo iniinyuhu maxay u baahan yihiin marka ay baxayaan. Tijaabadan samay si aad u ogaatid.

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay biyo, saddex bakeeri, xaashiyo iyo iniinyo galley.

Xaashiyaha ku rid bakeeriyada. Fiiri sawirka. Iniinyaha ku rid bakeeriyada. Labo bakeeri biyo ku shub. Bakeeriyada oo dhan dhig meel cadceed ah.





Labadii bakeeri ee aad markii hore biyaha ku shubtay, maalin kasta biyo ku shub. Maxaa ku dhacay iniinyihii aad biyaha ku shubtay? Maxaa ku dhacay iniinyihii aanad biyaha ku shubin.




Labadii bakeeri ee dhirtu ka baxday, bakeeri maalin kasta biyo ku shub ka kale biyo ha ku shubin.



Maxaa ku dhacay dhirtii la waraabiyey?

Maxaa ku dhacay dhirtii aan la waraabin ?

Dhirta iyo iniinyuhu waxay u baahan yihiin biyo ay ku baxaan



## DHIRTU XAGGEE AYEY BIYAHA KU QAADATAA

Dhirtu waxay u baahan tahay biyo si ay u korto. Xaggee ayey dhirtu biyaha ku qaadataa? Aynu tijaabo samaynno si aynu u ogaanno.

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay:
Labo geed oo isku mid ah oo labo dheri ka baxaya iyo biyo. Saddex maalmood labada geed midna ha waraabin. Labada geed midkood carradiisa xaashi adag ku dabool. Dabeeto labada geed mid waraabi. Fiiri sawirka.



Labo toddobaad sidaa u waraabi.

Labadaadii geed sida kuwa sawirka ku yaalla ma u ekaadeen. Geedkee ayaa dhintay? Xididdada labada geed halkee ayey ku jiraan? Geedka qaybtee ayaa biyaha u soo qaadda ?



**Dhirtu biyo ayey bixisaa.**

Dhirtu biyo ayey u baahan tahay si ay u baxdo. Biyaha waxay ka qaadataa xididdada. Biyaha wixii dheeraad ihi waxay ka baxaan caleemaha.



**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay geed yar, bakeeri weyn.

Raadso geed yar oo dheri ka baxaya, ama mid beerta dugsiga ka baxaya. Geedka ku afgembi bakeeriga. Haddii uu geedku ku jiro dheri; dheriga meel cadceed ah dhig. Saacad u dhaaf meeshiisa dabeedna fiiri waxa dhaca. Maxaa dhacay ?



Dhibco biyo ah ayaa ku samaysmay bakeeriga gudihiisa. Xaggee ayey biyahaasi ka yimaadeen? Geedka qaybtiisee ayey ka baxaan ?





**Dhirta iyo iniinyuhu waxay u baahan yihiin carro ay ku baxaan.**

Aynu sameynno tijaabo sida carruurta aad sawirka ku argtaa ay u samaysay.

**Tijaabo :**






Waxad u baahan tahay sinxi, bakeerii, carro, dhagxaan, iniinyo galley ah.



Sinxiga carro aad meel beer ah ka soo qaadatay ka buuxi. Bakeeriga dhagxaantii ku gur. Iniin ku rid carrada; iniin kalena ku dhex rid dhagxaanta. Biyo ku shub bakeeriga. Ha wada buuxin bakeeriga. Waraabi iniintii carrada ku jirtay.





**Carruurtu waxay arkeen iniinyihii oo sida aad sawirka ku aragtid u baxay.**

Dhirtaadii sidaas oo kale ma u baxday ?

Toddoba maalmood ka dib dhirtu sida sawirka aad ku aragtid ayey noqdeen. Sidaas oo kale dhirtaadii ma noqdeen?

Maxaa ku dhacay geedkii dhagxaanta ku beernaa ? Dhirta iyo iniinyuhu ma u baahan yihiin carro si ay u baxaan.

Carrada waxa ku jira macdan ay dhirtu cuntadeeda ka samaysato.

## DHIRTU MA U BAAHAN TAHAY ILAYSKA QORRAXDA

Waxaynu aragnay in dhirtu u baahan tahay biyo iyo carro si ay u baxdo. Dhirtu ma u baahan tahay wax kale si ay u baxdo. Aan raadinno. Carruurta aad sawirka ku aragtid tijaabadaas oo kale ayey samaynayaan.




**Waxad u baahan tahay : labo saxaaradood, iniinyo, carro iyo biyo.**

**Labada saxaaradood carro aad meel beer ah ka soo qaadatid ka buuxi. Iniinyo galley ah ku beer. Maalin kasta waraabi. Marka dhirtu soo baxdo, saxaarad ama kabadh (armaajo) ku xidh. Saxaaradda kale meel cadceed ah dhig .**



**Laba toddobaad ka dib dhirtii kabadhka ku jirtay sida sawirka aad ku aragtid ayey noqdeen. Dhirtii aad beertay sidaas oo kale ma noqotay ?**





Dhirtii ka baxday saxaaradda cadceedda taallay sida aad sawirka ku aragtid ayey u baxeen.

Sidaas oo kale ma noqdeen dhirtii aad beertay? Maxay ku kala duwan yihiin dhirta cadceedda tiillay iyo kuwa kabadhka ku jiray ?

Ma u malaynaysaa in dhirtu u baahan tahay ilayska cadceedda ? Ma ku bixi kartaa meel mugdi ah ?




## DHIRTU MA U BAAHAN TAHAY HAWO?

Dhirtu ma u baahan tahay hawo marka ay baxayso ? Aan tijaabo samayno.

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay; labo kiish oo caagga kabaha lagu keeno ah, carro, iyo iniinyo digir ah.




Waxad hubisaa inaanu kiishku daloolin. Carro kiishka badhkii ka buuxi iniinyana ku beer labada kiish.

Maalin kasta waraabi. Marka dhirtu ka dhex baxdo ladaba kiish ee dhererkoodu noqdo taako; mid afka ka xir oo saliid ka mari afka xiran.

Meel amaan ah dhig labada kiish.


Fiiri waxa ku dhaca dhirtii ka dhex baxaysey labada kiish.



Maxaa dhacay ? Dhirtii ka baxaysay kiishkii afka ka xirraa waa ay dhimataa. Hawo ayey waayaan.

Dhirtu waxay u baahan tahay hawo ay ku baxdo. Dhirtu waxay hawada ka qaadataa caleemaha.

## SIDEE BUU XAYAWAANKU U KORAA ?



Halkan waxad ku aragtaa dhir iyo xayawaan badan. Ma sheegi kartaa kuwa ay yihiin ?

Waxad aragtaa dhir iyo xayawaan waaweyn.

Waxa kale oo iyana aad ku aragtaa dhir iyo xayawáan yar-yar.

Sheeg sida ay dhirta iyo xayawaanka waaweyni ugu eg yihiin kuwa yar-yar.

Sheeg sidą ay ugą duwan yihiiǹ ?








**Ma taqaan sida ay dhirta iyo xayawaanku u koraan ?**
**Bal aynnu baarno sida ay u koraan.**

## SIDEE BAY SHIMBIRUHU U KORAAN ?



Fiiri sawirradan. Waxad ku aragtaa ugxan shimbireed. Ugxanta waxa ku dul fadhida shimbir.

Maxay samaynaysaa shimbirtu ? Maxaadse u malaynaysaa inay ugxanta ku dhici doonaan ?



Bal hadda fiiri ugxantii. Waxa ka muuqda dildillaacyo ?

Maxay dildillaacyadu yihiin ? Maxaase ku dhacaya ugaxdii ?


Shimbirta weyni maxay yeeshaa inta aan ugxantu noqon shimbiro yar-yar ? Waayo ?



Maxaa ku dhacay ugxantii ? Xagee bay shimbirahan yar yari ka yimaadeen ?







Sidee bay shimbirahan yar-yari ugu eg yihiin waalidkooda? Sidee bayse uga duwan yihiin ? Maxay kuwa waaweyni samayn karaan ee aanay kuwa yar-yari samayn karin ?

**Maxay Shimbiruhu u baahan yihiin si ay u koraan ?**

Ayaa caawinaya shimbirahan yar-yar ? Maxaa la siinayaa ?
Hoy noocma ah bay leeyihiin ? Maxay ugu baahan yihiin hoyga ?

Shimbiraha yar-yari waxa ay u baahan yihiin cunto ay ku koraan iyo hoy ay ku nabad galaan.






Fiiri sawirkan.
Maxaa halkan ka dhacaya ?

Maxay shimbiraha waaweyni samaynayaan ?

Shimbiraha yar-yari waxa ay u baahan yihiin in cadawga laga ilaaliyo ?

Maxaa kale ee ay shimbiraha yaryari u baahan yihiin si ay u koraan ?






**Shimbiraha isbeddel weyn** baa ku dhaca inta ay korayaan.

**Digaaggu waa shimbiro.**

**Sawirradani waxa ay ku tusayaan sida digaaggu u koro.**











Digaagga waaweyni carrurtiisa ma dhaqaaleeyaa ? Goorma ayey digaagga yar-yari u ekaadaan kuwa waaweyn ? Goorma ayey samayn karaan waxa ay kuwa waaweyni sameeyaan ?



## SIDEE BAY NAASLEYDU U KORAAN ?





Fiiri sawirradan. Waxa ay ku tusayaan waxa dhaca inta ay naasleyda yar-yari korayaan.

Maxaa isbeddello ku dhaca inta u dhexaysa marka ay dhashaan ilaa marka ay weynaadaan ?


Goorma ayey u eg yihiin waalikooda ?



Goorma ayey samayn karaan waxa uu waalidkoodu sameeyo?



Xayawaankan oo dhammi waa naasley. Maxaad ku garanaysaa?







Naasleyda badankoodu kama dillaacaan ugxan sida shimbiraha.

Naasleyda badankoodu iyagoo waalidkooda u eg bay dhashaan. Sidee bay naasleydan yaryari ugu eg yihiin kuwa waaweyn.






Sidee bayse uga duwan yihiin ?



**Maxay Naasleydu u baahan yihiin si ay u koraan ?**




**Maxay naasleyda yaryari ugu baahan yihiin cunto ?**

**Sidee bay u helaan cuntadooda ?**

**Fiiri sawirradan. Marka ay naasleydu yar yar yihiin cuntadooda sidan bay u helaan.**

**Waxa ay cuntadooda ka jaqaan hooyooyinkooda.**





**Xayawaan badan baa dhashooda hoy u sameeya ?**

**Sidee buu hoygu u caawiyaa naasleyda yaryar ?**


**Naasleyda yaryari waxay u baahan yihiin hoy ay ku nabad galaan.**




**Xayawaan badan baa dhashooda sidan oo kale u caawiya.**

**Sheeg sida ay naasleydani u caawinayaan dhashooda.**

**Naasleyda yaryari waxay u baahan yihiin in la ilaaliyo si ay u koraan.**



## SIDEE BAY XAMAARATADU U KORAAN?




Xayawaankan waxa la yiraahdaa xammaarato. Marka ay soconayaan waxa ay ku socdaan beerka. Taas ayaa loogu bixiyey xammaarato.


Xammaaratadu ma sidooda ayey ku dhashaan mise ugax bay ka dillaacaan?



Sidee bay xammaaratada yaryari ugu eg yihiin waalidkooda ?

Ma u malaynaysaa in isbeddel ku dhaco inta ay korayaan ? Waayo ?







## SIDEE BUU KALLUUNKU U KORAA ?

Xayawaankan waxa la yiraahdaa kalluun.


Kalluunku waa qayb weyn oo ka mid ah xayawaanka. Halkee buu kalluunku ku nool yahay?

Kallunka qaar waxa ay ka dillaacaan ugxan; qaarkoodna sidooda ayey ku dhashaan.

Sidee buu kalluunkani isku beddelaa inta uu korayo ?

Kalluunku dhashiisa cunto ma u raadiyaa?

Ma ka celiyaa cadawga? Hoyse ma u dhisaa?





## MEERTADA NOLOSHA EE CAYAYAANKA

**Baranbarada:-**

Cayayaanku waa xayawaan lix lugood leh.

Barabaradu waa cayayaan.

Midabkeedu wuu cawlan yahay.


Waxay ku nooshahay meelaha qarsoon ee madaw.

Buugaagta, dharka iyo kabaha ayey cuntaa.

Habeenkii uun bay soo baxdaa oo ay cunto raadsataa.

Baranbaradu si wanaagsan wax ma u aragtaa ?

Sidee bay haddaa cuntadeeda u heshaa ?




Baranbarada jirkeeda waxa loo qaybin karaa saddex qaybood:

madax, xabad iyo ubuc.

Madaxa waxay ku leedahay laba indhood oo waaweyn iyo laba dareeme. Il walba waxay ka kooban tahay indho yar yar oo farabadan. Labada dareemena way dhaadheer yihiin.

Madaxa waxa kale oo ay ku leedahay laba daan oo xoog badan oo ay cuntada ku calaliso.



Xabadka baranbarada waxa ku yaal afar baal iyo lix lugood.

**Luguhu way xubnaysan yihiin.**

**Lugaha way ku socotaa kuna oroddaa.**

**Baranbaradu way orod badan tahay.**

Afar baal oo kala sarreeya ayey leedahay.

**Afarta baal way kala duwan yihiin.**

**Laba way adag yihiin oo waxay dahaaraan kuwa hoose.**

**Labada baal ee hoose way fudud yihiin oo way ku duushaa.**



**Fiirsasho :**

Qabo oo dil baranbaro dabadeedna fiiri ubucdeeda. Waxaad arki in ay qaybo yaryar u qaybsan tahay. Qayb walba waxa la yiraahdaa **maraar.** Bal hadda maraar walba u fiirso.

Maraarta labadeeda dhinac midba waxaad ku arki dalool yar.

Daloolladaa yar-yar ayey hawada ka neefsataa.

Maraaryuhu ma wada leeyihiin daloollo ?



Baranbarada dheddigi waxay dhigtaa ugxan.


Toban iyo lix ugxood ayey markiiba dhigtaa.

Ugax walba waxay leedahay dahaar adag.

Muxuu dahaarku u taraa ugaxda ?

Hore ma u aragtay ugxaanta baranbarada ?

Waxaad ku arki meelaha madaw ama gidaarrada musqulaha.




Maalmo yar ka dib waxa ugxaanta ka dillaaca baranbarooyin yar-yar.

Baranbarada yari baalal ma laha waxayse u eg tahay ta weyn.

Baranbarada yar waxa la yiraahdaa koronkorro. Baranbarada yari way firfircoon tahay.

Way oroddaa, cunto ayey raadsataa; waanay kortaa.

Marka ay weynaato baalal bay yeelataa.

Baranbaradu waa cayayaan xun.




Waxay fidisaa cudurro fara badan.

Ha u oggolaan in ay guriga aad ku nooshahay soo gasho.

Sidee baa baranbarada guryaha looga ilaaliyaa ?

**LAYLI :**

1. Soo qaado ugxan baranbaro.
   Mid dahaarka ka fur. Sawir waxa aad aragtid.
2. Aad u fiirso baranbaro yar dabadeedna magacaw qaybaha sawirkan.



3. Waa caynkee midabka baranbarada yari ?
4. Baranbarada yari lugo ma leedahay ?
5. Baranbarada yari ma duuli kartaa ? Waayo ?
6. Eeg oo sawir baranbaro weyn lugteed.

# DUQSIGA

Duqsigu waa cayayaan khatar ah.

Jarmiska ayuu qaadaa oo wuxu keenaa cudurro fara badan.

Jarmiska wuxuu ku qaadaa ubucda,

lugaha iyo afka.

Jarmisku wuxuu dhaliyaa xundhurta,

daacuunka iyo cudurro kale oo badan.

Duqsigu wuxuu ku nool yahay qashin-qubka

iyo meelaha kale ee wasaqda ah.

Wuxuu cunaa khudaarta iyo hilibka qurmay.





Duqsi sow ma aad arag ?

Midabkiisu waa noocma ?

Timo yar-yar buu jirka ku leeyahay.


Sida baranbarada ayuu jirkiisu u qaybsan yahay madax, xabad iyo ubuc.


Duqsiga madixiisu wuu yar yahay waanu weegaarsan yahay. Wuxuu leeyahay indho waaweyn sida baranbarada.

Laba dareeme oo gaagaabanna wuu leeyahay.

Dhuun dheer buu afka ku leeyahay. Wuxuu ku nuugaa cuntada hoorka ah.

Hoorku waa waxa aan adkayn. Biyaha iyo caanaha ayaa ka mid ah hoorka.






Duqsigu ma cuni karo cuntada adag. Marka uu rabo in uu cuno candhuuf ayuu ku tufaa cuntada quruntay. Candhuuftiisa ayaa jilcisa cuntadii adkayd.

Marka ay cuntadu hoor noqoto ayuu dhuuntiisa dheer ku soo nuugaa.

Fiiri sawirkan oo arag sida uu cuntadiisa uu qaato.



Duqsigu lix lugood **buu xabadka** ku leeyahay. **Ma la mid yihiin** kuwii baranbarada ?

Laba baal oo waaweyn ayuu leeyahay.

Labadan baal wuu **ku duulaa.**

Waxa kale oo u leeyahay laba baal oo yar-yar.

Muxuu ku falaa kuwan ?

**Eeg ubucda duqsiga.**

**Wuxuu ku leeyahay timo badan.**

**Ubucdiisu ma le'eg tahay ta baranbarada ?**

**Imisa maraaryood buu ubucda ku leeyahay ?**




**Duqsiga dheddigga ahi ugxanta waxay dhigtaa meelaha qashinka lagu ururiyo.**

**Halkii mar waxay dhigtaa in ka badan boqol ugxood.**

**Ugxaantu way cadcad yihiin aadna way u yar-yar yihiin.**

**Indhaheennu keligood ma arki karaan ugxaanta duqsiga.**


**Muddo yar ka dib ugaxdu waxay isku beddeshaa dirxi yar oo cad.**




**Dirxiga yari wuu gurguurtaa oo cunto ayuu raadsadaa.**

Marka uu koro wuxuu isku beddelaa Buulley.

Maalmo yar ka dib ayey buulleydu noqotaa duqsi weyn.



Duqsigu wuxuu qaadaa jarmiska cudurrada dhaliya.

Waa in aan markaa loo oggolaan in uu tarmo oo u bato.

Taa waxa lagu ilaalin karaa qashin-qubka oo goor walba la daboolo; iyo qashinka oo la gubo.


Waxa kale oo wanaagsan in meelaha uu ku dhalo daawo lagu buufiyo.

Duqsigu wuxuu jecel yahay meelaha wasaqda leh.

Kuusnow in aad gurigaaga nadiif ka dhigtid si aan duqsigu kugu imaan.

**LAYLI :**

1. b) Imisa indhood buu leeyahay duqsigu ?
   t) Xirribo ma leeyahay duqsigu ?
   j) Duqsigu ma seexdaa habeenkii ?
   x) Goorma ayuu duqsigu firfircoon yahay ?
   kh) Duqsigu dhammaantii ma isku midab baa ?
2. Maxaynnu u karkarinnaa cuntada iyo biyaha inta aynaan cunin ama cabbin ?
3. Magacaw qaybaha sawirkan ?






## KANEECADA

Kaneecadu waa cayayaan aad u yar marka loo eego duqsiga iyo baranbarada.

Waxay ku nooshahay meelaha biyuhu fariistaan.

Habeenkii ayey soo baxdaa oo ay ina qaniintaa, dhiiggana inaga nuugtaa.

Halka ay inaga qaniintana waa aynu xoqnaa




Sida duqsiga iyo baranbarada ayuu kaneecada jirkeeduna u qaybsan yahay madax, xabad iyo ubuc.

Madaxa waxay ku leedahay laba dareeme iyo dhuun ay wax ku nuugto.

Dhuuntu sida irbadda ayey fiiqan tahay.

Waxay ku nuugtaa dhiigga iyo dheecaanka dhirta.

Kacneeca oo dhammi miyey nuugtaa dhiigga?




Kaneecadu waxay leedahay labo baal oo waaweyn oo ay ku duusho.

**Kuwaa dabadoodana waxay ku leedahay laba baal oo yaryar.**




**Baalasha yar-yari kaneecada ayey dheellitiraan marka ay duu-layso.**

**Imisa lugood bay leedahay kaneecadu?**



Kaneecada dheddigi ugxanteeda waxay dhigtaa meel biyo fadhiyaan. Halkii mar waxay dhigtaa in ka badan baqol ugxood. Ugxantu biyaha ayey dul sabbeeyaan. Aad bay u yar-yar yihiin oo dhib yaraan laguma arki karo.

Muddo yar dabadeed waxay noqdaan yuruuruc. Yuruuruca kaneecadu way dabaashaan cuntana way raadsadaan. Waxay leeyihiin dhuumo ay ka neefsadaan. yuruurucu wuxuu noqdaa buulley. Buulleydu cunto ma raadsato. Mar mar ayey biyaha dushooda timaaddaa si ay hawo u neefsato. Tartiib bay isugu beddeshaa kaneeco weyn. Kaneecada weyn ayaa duusha oo cunto doonata. Haddii ay dheddig tahay ugxaan ayey dhigtaa. Kaneecada weyni waxay noolaataa laba ilaa saddex toddobaad; ka dibna way dhimataa.






Kaneecada nafteedu cudurka way keentaa. Duumadu waa cudur ay dhaliso kaneecadu. Marka ay kaneecadu dhiig ka nungto qof duumo qaba waxa kale oo ay ka soo nuugtaa jarmis. Qof kale marka ay qaniinto jarmiskii ayey u gudbisaa. Qofkaasi wuu jirradaa oo duumo ayaa qabata. Si aynnu uga baxsanno duumada iyo cudurrada kale ee kaneecada:

b) Waa in aynnu kaneecada nool tirtirnaa, bullaacadda iyo gurigaba waxaynnu ku buufin karnaa daawada DDT.

t) Waa in mara-kaneeco la hoos seexdaa si qaniinyadeeda la isaga ilaaliyo.

J) Waa inaan kaneecada loo oggolaan in ay taranto.



Sidee baynnu kaneecada uga ilaalin karnaa taranka?

Daasadaha, dheryaha iyo weelka guriga oo

dhan waa in laga jiraa in biyo wasakh ihi galaan.

Waayo ?

Ma aragtay meel biyo fadhiyaan oo saliid lagu shubayo ?

Sidee bay taasi u hor joogsataa taranka kaneecada ?

## LAYLI:

1. Calaamadi ereyga hagaagsan :
   - b) Kaneecadu waxay leedahay (saddex, laba, afar) baal.
   - t) Kaneecadu waxay leedahay (shan, saddex, lix) lugood.
   - t) Kaneecadu waxay leedahay (shan, saddex, lix) lugood.
   - j) Kaneecadu waxay dhigtaa (ugxan, yuruuruc, kaneeco weyn).
   - x) Kaneecadu waa (xammaarato, cayayaan, berribiyood).
   - kh) Kaneecadu waxay dhalisa (xundhurta, daacuunka, duumada).
2. Magacaw qaybaha sawirkan.











Fiiri sawrradan. Ka soo saar kuwa waalidka ah. Mid walbana dhashiisa soo saar. Sheeg sida ay kuwa yaryari ugu egyihiin waalidkood. Sheeg sida ay ugu duwan yihiin ? Dhashan kuwee baa u baahan dhaqaalaha waalidkooda ?
Kuwee baan waalidkoodu dhaqaalayn ?





Ecg sawirradan kaneccada iyo shimiraha.

Ma tahay sidani sida habboon ce ay u koraan?
Sheeg qaladka ka jira dabeedna toosi.







Muxuu tilmaamayaa sawirkani ?

Kuwee baa xayawaankan ugxan ka dillaaca ?

Kuwee baa dhasha iyagoo waalidkooda u eg ?

Kuwee baa u baahan dhaqaalaha waalidkooda ?

Kuwee baa isbeddello badan sameeya inta ay korayaan ?


## DHULKA

**Fiiri sawirkan.** Hore ma u aragtay isaga oo kale. **Muxuu yahay ?**

Waxa weeye dhulka. Dhulku wuxu u eg yahay kubbad weyn. Marka aynu dul joogno ma arki karno inuu kubbad yahay.



**Bal dayaxa habeenkii fiiri, siduu u eg yahay? Waa kubbad oo kale. Haddii dayaxa lagu geeyo waxad arki lahayd** dhulka oo sida dayaxa kubbad **oo kale ah.**





## MAALINTA IYO HABEENKA


Hadda waa maalin, qorraxdii ayaa dhulka ifinaysa. Maalintii qorraxda ayeynu cirka ku aragnaa. Habeenkii qorraxda ma aragtaa? Maxaa dhaliya habeenka iyo maalinta?



Dhulku wuu wareegaa. Wareeggaas ayaa sameeya habeenka iyo maalinta. Dhulka dhinaciisa qorraxda ku jeedaa waa maalin. Dhinaca qorraxda ka sii jeedaana waa habeen.

**Tijaabo:**

Soo qaado kubbad iyo karbuuno (tooj). Qolka daaqadaha u wada xidh oo mugdi ka dhig.



Karbuunada shid. Miiska dulsaar. Kubbaddii ilayska ku beeg. Fiiri kubbaddii. (Ilaysku mar ma ku wada dhacayaa? Meesha karbuunadu iftiiminayso xanjo ku dheji. Wareeji kubbaddii. Meeshii xanjadu ku dhegsanayd ka sii jeedi karbuunada.

Sidaas oo kale ayaa qorraxdu dhulka u iftiimisaa. Dhulka ayaa wareega. Marba dhinac ayaa qorraxda ku soo jeeda, dhinacaasi waa maalin. Dhinaca ka sii jeedaana waa habeen.


Hadda adigu dugsiga ayaad joogtaa. Waa meeqa saac ? Carruurta dhulka dhinaciisa kale ku nooli waa ay hurdaan. Meeshoodu waa habeen.

## MUXUU DHULKU KA SAMAYSAN YAHAY ?

Dhulku wuxu u qaybsan yahay berri iyo biyo. Fiiri sawirka dhulka. Berriga iyo biyaha keebaa weyn ?

**Dhulka** oo dhan waxa ku **dedan hawo.**

Meesha aad joogtaa bad ma **leedahay?** Bal fiiri meesha aad joogtid, maxaad hareerahaaga ku aragtaa?



Dhulka berriga ahi isku mid ma aha; meelo waa buuro meelolona waa bannaan. Meelo dhir ayaa ka baxda. Berriga waxbaa lagu beertaa; xoolaha ayaa lagu dhaqdaa. Badaha maxaa laga helaa?





## DHAGXAANTA IYO CARRADA

**Dhulka berriga ihi wuxu ka samaysan yahay dhagxaan iyo carro.**

Dhulka haddii aad qoddid waxad ku arkaysaa carro iyo dhagxaan. Haddii aad tagtid meel dhagax laga qodayo waxad arkaysaa in dhagxaanta ay carro ka sarrayso. Ma sheegi kartaa meesha carradaasi ka timid ?



Dhagxaantu ma isku wada midbaa? Dhagxaan badan meelo kala duawn ka soo ururso. Fiiri dhagxaanta aad soo ururasatay. Midabkoodu ma isku wada midbaa? Dhagxaanta geel ka qoro. Dhaqxaanta oo dhan miyaad qori kartaa?

Dhagxaantu waa ay kala adag tahay. Qaar waa jilicsan yihiin oo waad jejebin kartaa, qaarna waa adag yihiin.


## MAXAA DHAGXAANTA LAGU FALAA ?


Dugsigiinu muxuu ka dhisan yahay? Dhagaxaanta guryaha ayaa lagu dhistaa. Waddooyinka ayaa lagu samaystaa. Wax kale oo dhagxaanta lagu samaysto ma taqaannaa ?



Dhagxaanta qaarkood waxa laga qodaa xadiidka baabuurta laga sameeyo; iyo dahabka dumarku ay isku qurxiyaan.

Waxa jira dhagax dhulka laga qodo oo sida dhuxusha loo shito. Dhagaxaas waxa la yidhaahdaa kool. Koolka sida batroolka ayaa maraakiibtu ku socotaa.







## CARRADU WAXAY KA TIMAADDAA DHAGXAANTA

**Dhagxaantu marka ay burburto waxay noqotaa carro. Laba dhagax oo jilicsan soo qaado. Warqad cad miiska duldhig. Labadii dhagax isku xoq. Maxaa warqaddii ku da-atay ? Sidaas oo kale ayaa dhagxaantu marka ay burburto ay u noqotaa carro.**



## MAXAA DHAGXAANTA BURBURIYA ?

**Dhagxaantu marka ay burburto waxay noqotaa carro. Maxaa dhagxaanta burburiya ?**



**Soo qaado daasad dabool leh, iyo dhagax** jilicsan. Dhagaxa dubbe ku jejebi. Jajabka daasadda ku gur. Biyo ku shub. Daasadda dabool. Daasadda aad u rux. Dhagxaantii ka soo saar. **Maxaa ku dhacay dhagxaantii ? Daasadda maxaa salkeeda fadhiya ? Saw carro ma aha ?**

Biyuhu marka ay socdaan ayey dhagxaanta isku xoqaan. Dhagxaantii waa ay burburtaa oo waxay noqotaa carro. Meel dix ah weli ma tagtay ?

Dhagxaanta taallaa fiiqfiiqyo ma leedahay ? Mise waa malaasan tahay ?

## DHAGXAANTA WAXA BURBURIYA DABAYSHA

Dabayshu waxay qaadataa dhagxaan yar-yar oo quruurux ah. Dhagxaantaa yar-yar ayaa ku dhacda dhagxaanta waaweyn.

Dhagxaantii ayaa is xoqda waxa markaas samaysma carro.

Dhagxaantii waaweyneyd waa ay burburtaa. Bal hadda meesha aad joogtid dhagxaanta taalla dushooda fiiri. Waxad arki doontaa iyaga oo rifan.

Dabayshu marmar dhagxaanta waxay u yeeshaa daldaloollo



Waxaa kale oo dhagxaanta burburiya xididdada dhirta. Waxa laga yaabaa inaad aragtid geed dhadhaab ka baxaya, oo xididdadiisii ay dhagaxii dhex-galeen. Geedku wuu koraa,



sida aad adba u kortid. Xididdadii geedka ayaa kora oo markaas dhagaxii kala dillaaciya.



## MAXAA KALE OO DHAGXAANTA BURBURIYA ?

Dhagxaantu waxay taallaa dibedda, maalintii cadceedda ayaa kululaysa; habeenkiina waa ay qaboobaan. Dhagxaanta roob ayaa ku da'a. Marka dhagxaantu kululaato waa ay kala baxdaa.

Marka iyada oo kulul roob helo, dhaqso ayey u qabowdaa. Marka ay qabowdo waa ay ururtaa dabadeedna oogada ayey ka burburtaa.

Weli ma aragtay bakeeri shaah kulul lagu shubay; markii dambana biyo qabow lagu shubay; oo qarxay. Sidaas oo kale ayey dhagxantu u burburtaa. Sidee nuuradda loo sameeyaa ? Nuuradda dhagxaan ayaa laga sameeyaa. Haddii aad taqaan qof daaraha dhisa weyddii.

## CARRADU MAXAY KA SAMAYSAN TAHAY ?

Dhagxaanta waxa burburiya waxyaabo badan. Dhagxaanta marka ay burburto waxay noqotaa carro. Carradu ma dhagxaantaa burburtay oo keliya ayey ka samaysan tahay ? Waxad fiirsataa meel dhiri ka baxayso. Maxaad dhirta hoostooda ku aragtaa ?

Waxa laga yaabaa inaad ku aragtid caleemo, laamo, iyo cayayaan yaryar: qudhaanyo, dirindiir, kabajaa. Cayayaankaasi marka ay dhintaan waxay ku darsamaan carrada. Caleemaha iyo laamuhuna waa ay burburaan. Waxay iyana ku ku darsamaan carrada. Markaa maxay carradu ka sameysan tahay?



## CARRADA WANAAGSAN



**Waxad tagtaa meel beer ah.** Majarafad carro ah ka soo qaado. Waxad kale oo tagtaa meel bacaad ah, meeshaasna majarafad carro ah ka soo qaado. Labo dhalo oo afweyn oo cadcad biyo ka buuxi. Labadii dhalo midba carro ku shub.

Fiiri waxa carradii ku dhaca. Dhaladii aad ku shubtay carradii aad beerta ka soo qaadday maxaa dul sabbaynaya? Dhaladii kale wax badani ma sabbaynayaan? Waxaasi waa wixii ka yimid caleemihii iyo cayayaankii bakhtiyey.

Waxyaabahaas ka yimaadda waxa nool waxa la dhehaa huyuumas. Carrada huyuumaska leh ayay dhirtu si wanaagsan ugu baxdaa.

Carradaas ayaa wanaagsan. Maxaa beeraleydu ay beerta digada ugu shubtaa ?



## CARRADA HAWO AYAA KU JIRTA.

Wixii nooli waxay u baahan yihiin **hawo. Iniinyuhu ma** nool yihiin? Waayo?

Iniinyaha marka la beero carrada ayaa lagu aasaa, xaggee ayey ka helaan hawo? Tijaabo: Beerta dugsiga carro ka soo qaa do, **carrada laba daasadood ku kala shub. Labada daasadood** midkood carrada ku jirta aad hoos isugu cadaadi.



**Koob biyo ku soo qaado. Carradii daasadda kale ku jir**tay biyihii qunyar ugu shub. Fiiri waxa dhaca. Maxaa car**radii ka soo baxay ? Xumbo ma ka soo budhbudh tiri ?**

**Xumbadaasi waa hawo carrada ka soo baxaysa.**


**Carraddii aad isku cadaadisay, biyihii ku shub.**

**Fiiri waxa dhaca. Xumbo** badani ma ka soo baxday ?

**Teebaa hawo badani ka soo baxday ?**

Waxa laga yaabaa inaad wax badan aragtay beer la qodayo. Maxaa beeraha loo qodaa ?

Sidii tijaabadii hore carro ka soo qaado beerta dugsiga. Labo daasadood ku kala shub. Carrada midkood aad isugu cadaadi. Iniinyo digir ah ku kala beer. Maalin kasta waraabi. Fiiri iniinyaha soo biqla. Waxad arki doontaa in iniinyihii aad ku beertay carrada cadaadsani aanay soo bixin.



Waxaa marka beeraha loo qodaa in carrada la kala furfuro si hawo u gasho. Carrada beeraha waxa ku nool dirxi-dhuleed. Dirxigu carrada wuu qodaa oo wuxu ka sameystaa dariiqyo hawadu uga soo gasho. Dirxi dhuleedku wuxu caawiyaa beeroolaha. Waayo carrada ayuu kala furfuraa markaas ayey hawo soo gashaa. Beeraha carrada wanaagsan waxa ku nool dirxi dhuleed aad u badan. Haddii aad meel beer ah tagtid carrada qod oo ka fiiri dirxi dhuleed.





Fiiri meesha aad joogtid; carradeeda midabkeedu waa sidee ?

Ma aragtay carro midab kale leh ? Carradu waxay ka samaysantaa dhegxaanta burburta. Dhagxaantu waa kala midab.

Carrada ka samaysantaana waa kala midab. Carrada waxa kale oo ku jira huyuumas. Carrada madow waxa ku badan huyuumaska. Carrada madoobi waa carrada wanaagsan ee dhirtu si fiican uga baxdo. Waxaad tagtaa meel waddo laga bixinayo ama god laga qodayo. Fiiri carrada laga soo saaro. Ma isku wada midabbaa ?

## CARRADA IYO BIYAHA

Waxa laga yaabaa inaad deggan tahay meel marka roobku helo ay biyuhu carrada dul fadhiistaan. Meeshaas oo kale marka aad soconaysid kabaha ayaa dhiiqo kaaga dhegtaa. Waxa kale oo jira meelo marka roobku ku da'o, aanay dhulka biyo fadhiisan; oo carradu biyaha liqdo. Maxay kala yihiin labada carro ?

### Tijaabo ?

Soo qaado laba qasacadood oo labada afba ka go'an.

Qasacadaha midba af maro balcad ah kaga xidh.

Carro bataax (niis) ah soo qaado, carro dhoobo ahna soo qaado, labada carro ku kala shub labadii daasadood, labadii daasadood laba bakeeri oo madhan dabada u geli. Labo bakeeri oo isle'eg biyo ka buuxii.


Biyihii isku mar ku shub carradii.



Fiiri carrada bataaxa ah biyuhu dhaqso ay'ay uga soo dusaan.

Maxaad aragtay ? Fiiri carrada dhoobada ah. Biyuhu aad ma uga soo dusaan ? carrada dhoobada ah biyo badani kama soo dusaan.

**Carrada bataaxa ah biyuhu dhaqso ayey uga dusaan.** Carrada fiican ee beerta waa inaan **biyuhu markiiba ka dusin;** waana in aanay dulfadhiisan. **Marka carrada fiican waxa la helaa haddii la isku daro carro bataax ah** iyo mid dhoobo ah.






## Biyaha aad u soconayaa waxay qaadaan carrada


Carrada wanaagsani waa carrada h[illegible]maska leh. Huyuumasku wuxu ka yimaaddaa caleemaha, [illegible]maha dhirta iyo cayayaanka ku dhinta. Caleemaha iyo cayayaanku waxay ku darsamaan carrada sare.

Haddaba carrada sare waa carrada wanaagsan ee dhirtu ka baxdo.

Carrada dhir ayaa ka dulbaxda oo qarisa. Marka dhirta la gooyo ama la gubo, carradii waa ay soo baxdaa.




Marka meeshii roob ku da'o biyihii aad ayey u socdaan oo carradii sare ee fiicnayd ayey qaadaan. **Haddii meeshu ay dhir badan leedahay, biyuhu aayar ayey socdaan. Carro badan ma qaadaan. Marka ay biyuhu meeshii carrada ka qaadaan, dhirtu kama bixi** karto. **Marka dambe meeshii waxa** ka **samaysma boholo** iyo togag **aan wax ka bixi karin.** Waxa **la dhahaa meehii** waa carroguurtay. Duqsiga agtiisa ma yihiin boholo ? Fiirso sida ay boholahaasi u waaweynaadaan.



## MAXAA KALE OO CARRAGUURKA KEENA ?

Sidii hore oo kale haddii carrada dhirta qarinaysa laga go-oyo, ama la gubo, carradii way qaawanaataa. Marka carradii la qaawiyo dabaysha ayaa carradii sare ee fiicnayd qaadda.

Marka carradu ay qarsoon tahay ee ay dhirtu ku dul taallo, dabayshu ma qaadi karto.



Dabayshu buuro carro ah ayey samaysaa. Meeshaasi waxa ay noqotaa meel aan waxba ka bixi karin.

Dugsigiinna ma u dhow yihiin meelo bacaad ihi. Meesha tag oo soo fiiri ?

Dhir badani ma ka baxdaa? Bacaadcelinta raadiyaha ma ka maqashay ? Ma aragtay meeshaas? Abbahaa weyddii waxa laga qabto meeshaas ?

## DHAQAALAYNTA CARRADA



Maxay ina tartaa carradu ? Sheeg cuntada aad cuntid.

Xaggee ayey ka timaaddaa? Waxay ka timaaddaa dhirta ama xayawaanka. Dhirtu waxay ka baxdaa carrada. Xaywaanka aynu dhaqannaana wuxu cunaa oo uu ku nool yahay dhirta.

Markaa inagu waxaynu ku nool nahay carrada. Haddii dhulku carraguuro, dhiri kama baxdo.


Haddii dhirtu ay bixi waydo xayawaankii aynu dhaqanaynay wuu dhimanayaa, inaguna gaajo ayeynu la dhimanaynaa.

Waa inaynu carrada dhaqaalaynaa si aynu u noolaanno. Si-dee carrada loo dhaqaaleeyaa? Waa inaan dhirta la goynin. Waa inaan xoolo badan oo dhirta wada daaqa aan meel qudha la daajin. Waa inaan dhirta la gubin. Waa in dhulka carroguura dib loo hagaajiyaa oo dhir lagu beeraa. Waa in boholaha la xidhaa.

## MAXAA CARRADA LAGA SAMAYSTAA ?

Magaalada aad joogtid guryaha maxaa lagu dhistaa ? Ma dhagax ayaa laga wada dhistaa ? Kuwo carro laga dhisay ma jiraan ? Maxaa kale oo carrada laga samaystaa ? Carrada waxa laga samaystaa dheryo, leben daar lagu dhiso. Ma taqaannaa sida lebanka iyo dheryaha loo sameeyo ? Haddii aad aragtay ama taqaanno cid samaysa raadso, weyddii sida ay u sameeyaan. Weyddii carrada ay ka sameeyaan.







# LEBANKA IYO DHERYAHA SIDA LOO SAMEEYO

Fiiri sawirkan, maxaad ku aragtaa ? Carruurtu waxay samaynayeen leben iyo dheryo. Adigu ma samayn kartaa lebenka ay samaynayaan ? Waxay soo qaateen carro, biyo iyo weel ay ku soo qaadaan. Koox koox ayey u shaqaynayaan. Qolo walliba waxay rabtaa inay leban kuwaa qoladа kale ka fiican sameeyaan.






Qolo carro kala jaad ah ayey isku dareen, oo ay leban ka samaynayaan. Kuwa kale carradii waxay ku dareen çaws, dabeedna leban ay ka sameeyeen. Kuwo kale dheryo iyo leban ayey wada samaynayaan.

Qolo waliba lebanka ay sameeyaan waxay ku qorayaan magaca qofka sameeyey dabeedna waxay dhigayaan meel goni ah; Cadceedda ayey lebanka ku qallajinayaan.




Ardaydii oo dhan ayaa lebankii isu keentay. Waxay dooneen inay gidaar ka dhisaan. Lebankii ayey isdulsaareen. Fiiri sawirka. Gidaarkii way dhisi kari waayeen. Lebankooda ayaan isle'ekayn; isku mid ma aha oo qaar ayaan dhinacyadoodu toosnayn.



Waxay isku raaceen inay leban isle'eg oo dhincyadiisu tosan yihiin ay sameeyaan. Sidee ayey u samayn karaan leban isku mid ah ?


Qolo waliba waxay samaysatay saxaarad yar oo loox ah. Saxaaraduhu waa ay iswada le'eg yihiin. Carrada oo qoyan ayey saxaaradda ku rideen. Lebankii saxaaradda ayey ku dhexsameeyeen.



Kuwo ayaa waxay ogaadeen in lebanku adkaado marka la gubo. Waxay qodeen god. Godkii ayey lebankii ay sameeyeen ku gureen. Qoryo yar-yar ayey lebankii dulsaareen. Dab ayey ku shideen.


Qolo waliba waxay qoladii kale ku tiri lebankayga ayaa kiinna ka fiican. Waxay yiraahdeen aan isu fiirinno ka adag Lebankii ayey meel dheer ka soo daayeen. Waxay fiiriyeen ka hor jaba. Waxa kale oo ay yiraahdeen aynu fiirinno ka hor bur-

qura marka biyo lagu shubo. Lebankii ayey dhulka dhigeen oo ay biyo ku shubeen.



Markii ay lebankii isu eegeen, ayey isweydiiyeen waxa lebankii ugu fiicnaa uu ka samaysan yahay.

Markaas ayey dib u samayeen leban fiican. Waxay markaas isku raaceen inay lebankii dhirta dugsiga ay dayr uga sameeyaan.





## HAWADA HAREERAHEENN[illegible]

Waxa laga yaabaa in hooyadaa ay ku tidhaahdo «bakeeri madhan ii keen». Bakeerigu miiska ayuu saaran yahay. Bakeeriga biyo iyo caano midna kuma jiraan. Waxa la moodaa inuu madhan yahay. Runtii miyuu bakeerigu madhan yahay ?

Maya, ma madhna. Bakeerigu mar walba waa buuxaa. Waxa la moodaa inuu madhan yahay. Waxa ka buuxda hawo. Ma arki karno hawada bakeeriga ku jirta. Hawada lama arki karo. Hawadu waa jirtaa. Meel ayey buuxisaa. Waxay ku jirtaa oo ay buuxinaysaa bakeeriga.

Hareeraheenna waxa ah hawo, ma arki karno. Waxa aynu aragnaa waxay qabato. Waxa aynu garan karnaa in hawo inagu wareegsan tahay. Fiiri sawirrada. Kubbadda maxaa laga buuxinayaa? Abuteyga inanku haysto [illegible] wada ?






**Tijaabo:**

Wa[illegible] an tahay: dhalo, masaf, biyo iyo dhoobo [illegible]oyan. Masafka dhalada afka [illegible]li. [illegible] afkeeda dhoobada ku dhej[illegible] [illegible]yo ku shub masafka. [illegible] ma galeen

**dhalada ? waayo ?**




**Tijaabo:**

Waxad u baahan tahay dhalo iyo baaldi biyo ah. Dhalada oo foorarta biyaha hoos u geli. Biyihii ma galeen dhaladii ? Maxay u geliwaayeen ?

Dhaladii oo biyihii ku jirta, dhinac u janjeedhi. Maxaa dhacay? Biyihii ma galeen dhaladii ?

Maxaa ka soo baxaya dhalda. Hawo ayaa dhalada ku jirta.




Biyihu ma geli karaan. Marka dambe hawadii ayaa ku soo baxday. Biyihii ayaa dhaladii markaas galay.

**Tijaabo:**

Waxad u baahan tahay: Bakeeri, xaashi, iyo baaldi biyo ah.
Xaashida bakeeriga gudihiisa geli. Bakeerigii oo foorara baaldigii hoos u geli. Qunyar bakeerigii hoos biyihii ugu riix. Bakeerigii biyaha ka soo saar. Xaashidii ka soo saar. Xa-



ashidii waa ay qallalan tahay. Hawo ayaa bakeeriga ku jirtay. Hawadii ayaa biyihii ka celisay bakeeriga.




**Tijaabo:**

Waxad u baahan tahay: bakeeri, dhalo iyo baaldi biyo ah.

Bakeeriga baaldiga dhexdhig. Biyo ha ka buuxsamo. Dhaladii biyihii ku fiirari oo hoos ugu rix. Yaanay biyo gelin. Bakeerigii kor u soo qaad. Biyaha ha ka saarin. Dhaladii hoos keen bakeerigii. Dhaladii janjeeri. Xumbo hawo ah ayaa gasha bakeerigii ku jireen; hawadii waxay gashaa meeshii biyahu ku jireen.

Hawadu waa wax jira, oo dhab ah. Meel ayey buuxisaa. Dhalada ayaa laga shubi karaa. Waxa lagu shubi karaa bakeeriga.



# HAWADU CULAYS AYEY LEEDHAY


Weli ma is miisaantay ? Waa intee culayskaagu ? Wax waliba culays ayey leeyihiin. Biyuhu culays ayey leeyihiin. Carradu culays ayey leedahay. Hawaduna culays ayey leedahay. Biyaha iyo carrada waa aynu arki karnaa. Hawada ma arki karno. Waxa aynu samayn karnaa tijaabo inna tusaysa in hawadu culays leedahay. Tijaabadu waxay inna tusaysaa in waxaas aan la arki karini uu culays leeyahay.

**Tijaabo:**

**Waxad u baahan tahay: Masdarad dheer, dun adag, laba nacaal. Masdaradda dhexda ka dalooli. Daloolka duntii ku xidh. Meel ka soo lul masdaraddii. Labadii buufimo neefi, isle'ekaysii.**

Labadii buufimo midba masdaradda madaxeeda ku nacaal. Masdaraddu ha dheellitiranto. Buufimo biin ku dalooli. **Maxaa dhacay?**

Masdaraddii waa ay dheelliday. Waxay u janjeedhsantay dhinacii buufimada buuxdaa ay ka lulatay. Buufimada hawadu ku jirto ayaa culus. Hawadu culays ayey leedahay.



# GEBAGEBO


Saynisyahannadu waxay dhehaan gebagebo marka ay sheegayaan wixii ay ka heleen tijaabada ay sameeyaan. Tijaabadii aad hadda samaysay waxa ay ku tustay in hawadu culays leedahay. Hawadu culays ayey leedahay waxa ay noqonaysaa gebagebadii tijaabada.

Saynisyahannadu waxay hubiyaan gebagebada tijaabada. Ma doonaysaa inaad saynisyahan noqotid hubi gebagebadii tijaabadii aad samaysay. Sida ugu fiican ee aad ku hubin karto tijaabada waa adiga oo tijaabada ku celiya mar labaad, ama dhowr jeer, ama mid kale sameeya.

Mar labaad isku day.

**Tijaabo:**

**Waxad u baahan tahay: kubbad, cabbeeye, miisaan.** Kubbad madhan. Kubbaddii buuxi. Kubbaddii buuxday ee hawadu ku jirtay waa ay ka culays weyn tahay kubbaddii madhnayd. Hawadu culays ayey leedahay.



## HAWADU WAA AY FIDDAA

Hawadu mar kasta meel isle'eg ma buuxiso. Marmar in hawo ah ayaa meel yar buuxisa. Maarar kalena isla intii hawada ahayd waxay buuxisa meel weyn. Hawadii intii hore waa ay ka weynaataa. Marka hawadu weynaato, waxa weeye meel weyn ayey buuxisay.


**Tijaabo:**

Waxad u baahan tahay: buufimo; dhalo; iyo laambad. Buufimada dhalada madaxa u geli. Dhaladii laambad shidan ku kululay. Maxaa ku dhacay buufimadii ?

1.



2.



Hawadii ku jirtay dhaladu waa ay fidday. Buufimadii waa ay foocdaa, kulku wuxu fidiyaa hawada. Hawada kululi waxay buuxisaa meel ka weyn meesha hawada qaboobi buuxiso.



## HAWADU WAA AY URURTAA.


Waxa aad samaysay tijaabo tusaysa sida hawadu u weynaato ama u fiddo. Waxad tusi kartaa sida hawadu u yaraato. Marka waxyaaluhu ay yaraadaan waxa la dhehaa waa ururay, hawada waa aad yarayn kartaa, ama waxa aad ku qasbi kartaa inay ururto.

**Tijaabo:**

Waxad u baahan tahay: dhigsi, buufimo, dhalo. Dhaladii tijaabdii hore oo kale soo qaado.

Buufimadii dhalada afka u geli. Dhaladii kululay. Marka buufimadii ay weynaato hawadii ku jirtay ayaa fidday. Dhaladii iyo buufimadii wax yar qabooji. Barafkii digsiga ku gur. Dhaladii digsiga gunta u geli. Maxaa ku dhacay buufimadii.

3.



Buufimadii waa ay yaraatay. Marka hawadu qabawdo waa ay yaraataa, ama waa ay ururtaa.

## CARRADA HAWO AYAA KU JIRTA

**Dirxidhuleedku wuxu ku nool yahay carrada hoosteeda,** Marka roobku da'o ee biyuhu carrada qariyaan, waxad aragtaa **dhirxidhuleed carrada dusheeda u soo baxay. Muxuu u soo baxaa? Tijaabadan ayaa inoo sheegaysa.**

**Tijaabo.**

**Waxad u baahan tahay:carro; bakeeri.**

**Carro ku shub bakeeri. Biyo ku dul shub carrada. Bakeeriga biyaha ka buuxi. Ma aragtaa xumbo biyaha ka soo budhbudh leh? Xumbadaas aad aragtaa waa hawo. Hawadaasi waxa** ay ka timid carrada. Carrada hawo ayaa ku jirta.

**Dirxidhuleedku wuxu neefsadaa hawada carrada ku jirta. Marka roobku da'o biyaha ayaa carrada gala. Biyuhu hawada ayey carrada ka saaraan. Dirxidhuleedku carrada korkeeda** ayuu yimaadaa si uu hawo u helo. Marka roobku da'o raadso **dirxidhuleed. Hadda ma taqaan waxa dirxidhuleedku uu debada ugu soo baxo. Hawo ayuu soo doontaa. Wixii nooli hawo ayuu u baahan yahay.**





## DIRIXI DHULEEDKA

Dirxi-dhuleedku wuxu u fiican yahay carrada. Dirxi-dhuleedku wuxu kala furfuraa carrada. Carrada kala furfurani waxay u fiican tahay dhirta. Dhirtu waa ay ka baxdaa carrada kala furfuran; hawo ayey ka heshaa. Dirxi-dhuleedku caleemaha dhirta ka dhaca ayuu carrada hoos u geliyaa. Caleemuhu waa ay qudhmaan. Waxay noqdaan huyuumas. Huyuumsaku carrada ayuu wanaajiyaa.

Dirxi-dhuleedku carrada ayuu qodaa. Had iyo jeer hoos ayey u qodaan. Carrada ayey hagaajiyaan. Fiiri marka roobku da'o; biyaha ayaa geedaha qariya. Fiiri dirxi-dhuleedka. Muxuu **dhulka uga soo baxaa ?**



## NEEFSASHO

Noolaha oo dhammi wuxu u baahan yahay hawo. Dhirtu waxay u baahan tahay hawo. Xayawaanku wuxu u baahan yahay hawo. Dadku waxay u baahan yihiin hawo. Haddii nooluhu u hawo waayo wuu dhintaa. Dhirtu waa ay dhimataa. Xayawaanku wuu dhintaa.


Hawada waa aynu neefsannaa. Haddii aan hawo jirin ma hadli karneen, ma heesi karneen. Hawo la'aan ma noolaan karno.

Saaxiibkaa fiiri wuu neefsanayaa. Saaxiibkaa aad u neefso dheh. Dhegayso neeftiisa. Waxad maqli hawada oo sankiisa gelaysa iyo hawada oo ka soo baxaysa.

Hawadu waa wax jira, oo dhab ah. Meel ayey buuxisaa. Sanbabadu waxay ku yaalliin xabadka. Waa labo sanbab. Midba dhinac ayuu ku yaallaa. Fiiri sawirka.

Gacmahaaga laabta saar. Maxaa dhaca marka aad neefsatid ? Aad u neefso cabbaar.







## XAGGEE BUU KALLUUNKU HAWO KA HELAA ?


Weli kalluun ma cuntay ? Ma argtay isaga oo nool ? Kalluunku waa cunto fiican. Jidhka ayaa ku kora. Kalluunku wuxu ku nool yahay biyaha dhexdooda, baddaha iyo webiyada. Wixii nooli hawo ayuu u baahan yahay. Xaggee kalluunku hawada ka helaa ? Kalluunku wuxu cunaa dhir yar-yar oo biyaha ka dhex-baxda. Dhirtu waxay u baahan tahay hawo ay ka samayso cunto ay cunto.

**Xaggee ayey hawada ka heshaa ?**

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay: Biyo, dhalo, laambad. Dhalada biyo ka buuxi. Dhalada laambadda ku kululay. Maxaa dhaca ?

Xumbo hawo ayaa biyahaa ka soo budhbudh tiraahda marka la kululeeyo. Hawadu waxay ka soo baxday biyaha. Biyaha hawo ayaa ku jirta. Haddii aad bakeeri biyo ku shubtid oo aad meel cadceed ah dhigtid, waxad ku arki xumbo hawo oo ka soo baxaysa. Ma garatay meesha kalluunku hawada ka helo ?



## SIDUU KALLUUNKU U NEEFSADAA ?

**Kalluunku wuxu u baahan yahay hawo uu neefsado.** Kalluunku uma helo hawada sida aynu u qaadanno. Kalluunku ma laha sanbabbo uu ka neefsado. Wuxuu leeyahay waafyo. Waafyadu waxay ku yaalliin labada dhinac ee madaxa kalluunka. Kalluunku wuxu biyaha ka cabbaa afka. Biyuhu waxay galaan waafyada. **Waafyadu waxay biyaha kala baxaan hawada ku** jirta. Biyihii waxay ka baxaan daloollada labada dhinac ee madaxa kalluunka ku yaalla.

Haddii aad kalluun heli kartid raadso; fiiri waafyada, iyo daloollada biyuhu ka baxaan.







## HAWADA IYO GUBASHADA

Ma aragtay dab lashidayo? Maxaa dheriga loo dhardhaaraa oo dabka loo dulsaariwaayey ? Tijaabadan ayaa inoo sheegeysa.


**Tijaabo :**

**Waxad u baahan tahay :**

**Afar shamac; afar qardaas; afar bakeeri amo afar dhalo oo kala waaweyn.**

**Shamacyada ku jooji qardaasyada. Shamacyada shid. Shamaaycda saf. Adiga, iyo saaxiibadaa isla mar qura ku afgembiya bakeeriyada afarta shamac. Fiiri waxa dhaca. Shamacee ayaa ugu hor dama?** Shamaca uu ku daboolan yahay bakeeriga yari ayaa ugu hor dama. **Shamaca uu ku daboolan yahay bakeeriga ugu weyni, ayaa ugu dambeeya.**


**Bakeeriyada hawo ayaa ku jirta. Bakeeriga weyn hawo badan ayaa ku jirta. Shamacu hawada ayuu ku baxaa. Shamaca ku jira bakeeriga weyni hawo badan ayuu helaa, muddo badan ayuu baxaa. Marka ma garatay waxa dabka loo dhardhaaro. Haddii dheriga la dulsaaro dabka oo aan dhardhaarayn; hawda ayuu ka xidhaa. Dabkii wuu damaa.**



## AAN SAMAYSANNO ABUTEY

Cabdi wuxu samaystay abutey fiicaan. midabbo ayuu u yeelay. Ma samaysan taqaan? Isaga iyo saaxiibbadii ayaa israacay. **Waxay doonayeen in abutayga ay cirbixiyaan. Abutaygii cabdi kor ayuu u baxay, isaga ayaa ugu sarreeyey. Markii dambe ayey** abutayadii duuli waayeen. Cabdi wuxu yiri ina keena dabayli ma jirto eh. Dabayshii waa ay joogsatay. Dabayshu waa maxay?

Dabayshu waa hawo soconaysa. Dabayshu had iyo jeer ma dhinac keliya ayey u dhacdaa? Maalin kasta fiiri calanka dugsigu dhinaca uu u ruxmayo.



**Dabaysha wax baynu ku qa-**bsannaa. Fiiri sawirkan, maxa**ad ku aragtaa ? Waa ceel matoor leh. Dabaysha ayuu ku shaqeeyaa. Tuulada aad joogtid, ceelashaasi ma yihiin** ?

Dabayshu waxay firdhisaa ini**inyaha dhirta. Xusuuso:**

**Dhirtu iniinyaha ayey ka** baxdaa. Haddii ay iniinyuhu geedka hoostiisa ku wada daataan, dhirta iniinyaha ka baxdaa, cunto ku filan ma hesho.

**Waa ay dhintaan. Iniinyaha dabaysha raacaa waxay leeyihiin dhogar ay ku sabbeeyaan** Raadso iniinyaha hawada dhe**xsabbeeya.**



## DAXALKA

Fiiri sabaradaha ku samaysan dariishadaha dugsiga ama gurigiina. Ranji ma marsan yahay? kuwo aan ranji lahayn **ma aragtay ? Sidee midabkoodu yahay ?**

Weli ma aragtay musbaar cusub? Waa sidee midabkiisu? U fiirso alaabada kale ee aad aragtid. Quraaradaha dariishada**ha guryaha midabkoodu ma isbeddelaa? Maxaa sabaradaha iyo** musbaarrada midabkoodu isu beddelaa ? Maxaa sabaradaha ranjiga loo mariyaa? Aynnu baranno.

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay: musbaar, biin, makiinad, qalin, jab quraarad ah, iyo masaxad (goomo), bakeeri biyo ah.

**Alaabadaas biyaha ku dhexrid dabeeto ka saar oo dari-**shadda dibaddeeda dhig. Shan maalmood ka dib fiiri. Maxaa ku dhacay alaabadii ? Kuwee midabkoodii isbeddelay ? Mus**baarka, biinka iyo makiinaddu marka ay sidaa noqdaan waxa la dhelaa waa Daxalaysteen.**

Alaabada oo dhami ma daxalaysato. Quraaradda iyo qalinka midna ma daxalaysto. Musbaarka, biinka iyo makiinaddu **waxay ka samaysan yihiin xadiid. Xadiidka ayuunbaa daxalaysta. Maxaa daxalka keena ?**

**Tijaabo :**

**Waxad u baahan tahay: afar musbaar ama biin oo dhalaalaya, daasad, carro, biyo.**

Daasadda carrada ku shub. Carrada biyo ku qoy. Labo mu**sbaar carradii duldhig. Labadii musbaar ee kale** dariishadda dhinaceeda debedda xiga saar; shan maalmood ka dib fiiri musbaarradii. Kuwee ayaa aad u daxalaystay ?

Daxalaysiga xadiidka waxa dhaliya biyaha, musbaarradii carrada qoyan yaallay ayaa aad u daxalaysatay. Biyuhu keligood ma dhaliyaan, daxalka waxa dhaliya hawada; iyo biyaha oo wada socda.


## MAXAA XADIIDKA LOO RANJIYAA?

**Tijaabo** :

**Waxad u baahan tahay: Afar musbaar oo cusub oo dha-**laalaya, loox yar, ranji, iyo xaydh.

Afarta musbaar ka taag looxa. Musbaarrada mid ranji mari, **midna xaydh mari, labana waxba ha marin.**

Looxii dig fasalka dibaddii**sa. Labo toddobaad ka dib fii**ri musbaarradii aanay waxba **marsanayn. Ma daxalaysteen ?**



musbaarradii ranjiga iyo xaydhu marsanayd ka xoq. Ma **daxalaysteen ? Hadda ma garanaysaa waxa alaabada xadiidka ah loo ranjiyo ?**

**Xadiidku marka uu daxalaysto wuu jilcaa. Si fudud ayuu u jabi karaa.**

Si aanu u daxalaysan waa la ranjiyaa. Baabuurta iyo wixii **kale ee xadiid ka samaysan waa la ranjiyaa.**




## HAWADU WAXAY QAADATAA BIYO

Marka roobku da'o biyuhu waxay buuxiyaan meelaha god**an. Dhawr maalmood ka dib biyihi waa ay baaba'aan. Xag**gee ayey qabtaan ? Dharka oo qoyan ayaa la wadhaa

Cabbaar kadib wuu qallalaa. Biyihii waa ay ka baxaan. Dhirta

biyo ayaa ka baxa caleemahooda. Biyahaasi waxay galaan hawada

Hawada mar kastaba biyo ayaa ku jira.



## BIYAHA

**Maanta markii aad hurdada ka toostay maxaad samaysay ?**

Wejiga ayaad maydhay. Maxaad ku maydhay ?

**Biyaha wax kale oo lagu falo ma garanaysaa ? Fiiri sawir-radan dabeedna sheeg waxa ay tusayaan.**







**Waxyaabahaas kala duwan ayaynu biyaha ku falnaa. Biyaha waxaynu ka helnaa meelo kala duwan. Waxaynu ka** soo qaadannaa ceelasha; har-ooyinka, togagga.



Biyaha meelahaas laga soo dhaansadaa ma aha nadiif. Waxa ku jira waxyaabo cudur laga qaado, oo dadka jirro ku rida. Waa in la hubiyaa in biyaha la cabbayaa ay nadiif yihiin. Magaalooyinka **waaweyn biyaha waxa qaada qasabado. Biyahaasi waa** nadiif. Biyaha ceelasha iyo webiyada laga soo dhaansadaa na-diif ma aha.

**Biyaha aan nadiifta ahayn waxa ku dhexnool noole yar-yar oo aan la arki karin. Waxyaalahaas waxa lagu arkaa weyneyso.**

Dhakhtarkani wuxu biyihii ku eegayaa weyneyso. Fiiri waxa uu ku arkay.

**Waxyaalahaas nool ee yar-**yar ee biyaha ku jira marka ay caloosha qofka galaan; qofku wuu jirradaa.


**Haddaba si loo helo biyo nadiif ah. Waa in biyaha la kariyaa, dabeedna lagu shubaa weel nadiif ah, oo dabool leh.**



### Dhirta iyo Xayawaanka waxay u baahan yihiin biyo

Dhirtu waxay u baahan tahay biyo. Haddii ay biyo weydo waa ay dhimataa. Marka aan roob jirin dugsiga hareerahiisa dhir badan miyaad ku aragtaa ? Dhirta yar-yari waa ay dhimataa marka ay roob weydo, kuwa waaweynina waa ay qallalaan Marka roob da'o ayey dhir badani soo baxdaa. Waxa jirta dhir meelaha oomanaha ah ka baxda. Dhirtaasi xaggee ayey biyo ka heshaa?

Dhirtaasi waxay biyaha ku kaydsataa jirridaheeda. Dhirtaas waxa ka mid ah tiinka, dacarta iyo mooliga.



Meesha aad joogtid dhirtaasi ma ka baxdaa ? Haddii ay ka baxdo, middi ku sar. Waxa ka soo daadan doona dheecaan. Dheesaankaas waxa ku jira biyo.



Xayawaanku waxay u baahan yihiin biyo ay cabbaan sida aad adiguba biyo ugu baahan tahay. Xoolaha la dhaqdo waa la waraabiyaa.

Haddii ay biyo waayaan waa ay dhintaan. Digaag ma leedihiin ? Haddii aad leedihiin waraabi. Dhirta dugsiga ku hor beeran markaaad fasaxa tahay waraabi.

Noolaha oo dhami wuxu u baahan yahay biyo. Haddii aanay biyo jirin nololi ma jirteen.



## DHIRTA IYO XAYAWAANKA BIYAHA KU DHEXNOOL

Waxad tagtaa meel dhijaan ah oo biyo ku jiraan. Fiiri. Dhegayso. Maxaad aragtaa ? Maxaad maqashaa ? Wax badan baad arki kartaa, wax badan ayaad maqli kartaa. Noole badan ayaa biyaha ku dhexnool. Fiiri xayawaanka, fiiri dhirta ku nool. Dhegeyso jabaqda. Jirriqaa ayaa ciyaya; boolibarooro ayaa guuxaya, rah ayaa dhaadhaa leh, kalluun ayaa biyaha dhexmaaxaya, shimbiro ayaa ciyaya dabaysha ayaa dhirta kaga dhawaajinaysa. Soo qor wixii aad aragtid. Sawir wixii aad aragtid.






## BOOLIBAROORO

Boolibarooro wuxu u eg yahay dugsi dabo dheer. Wuxu had iyo jeer joogaa meelaha biyuhu muddo badan ku jiraan.

Boolibarooro waxtar ayuu dadka u leeyahay. Wuxu cunaa cayayaanka dadka dhiba. Wuxu cunaa kaneecada iyo duqsiga.

Boolibarooruhu wuxu ugaadhsadaa cayayaanka; aad ayuu u dheereeyaa, miridhkiiba wuxu duuli karaa hal kiiloomitir. Wuxu leeyahay baalal iyo addimo xoog weyn. Cayayaanka kale wuxuu ku qabsadaa addimadiisa xoogga weyn.



## BOOLIBAROORO KORAYA

Baalibaroorahu wuxu noloshiisa barkeed ku nool yahay biyaha dhexdooda. Ukuntiisa ayaa marka hore uu ku dhalaa biyaha dhexdooda. Laba toddobaad ka dib ayey ukuntii dillaacdaa.



**Waxa unkuntii ka soo baxa xayawaan yar, xayawaankaas** yari uma eka boolibarooraha weyn. Dhasha yar ee boolibarooraha waxa la dhchaa koronkorro. Wuxu ku noolaadaa **biyaha dhexdooda. Wuxu afka ku leeyahay ciddiyo af badan oo uu ku qabsado cayayaanka biyaha** ku nool. Mar**ka uu biyaha ku dhex noolaa**do labo sano ayuu u baxaa **dhirta biyaha ka dhexbaxda.** Dabadeeto wuxu ka dillaacaa dabarka. Waxa markaas ka soo baxa boolibarooro weyn oo qurux badan.



Baalashii qoyanaa ayaa qorraxdu u qallajisaa. Markaas ayuu duulaa. Wuxu kor duulaa biyaha. Waxa had iyo jeer **uu ku nool yahay meel biyaha u dhow. Mar dambe biyihii dib ugu noqon maayo; noloshiisa** inta dambe wuxu ku noolaadaa berriga.



## RAHA

**Xayawaanka kale ee biyaha ku dhexnool wax ka mid ah raha. Jidhaanta hareeraheeda raha ma ku aragtaa ?** Raha soo qabso. Fiiri jirkiisa. Addimadiisa fiiri. Sidee ayey yihiin. Waxay u eg yihiin addimada shimbiraha biyaha dulsabbeeya. Addimadiisu waa badeel oo kale. Rahu si fiican ayuu u dabaashaa. Addimadiisa ayaa u samaysan dabaasha. Waxa laga yaabaa inaad aragtid rah biyaha dhex dabaalanaya. Fiiri sida uu u dabaalanayo. Rahu ilko ma laha. Wuxu leeyahay carrab dheer. **Carrabka dheer ayuu cayayaanka ku qabsadaa.** Rahu wuxu cunaa cayayaanka.

**Rahu waa berribiyood. Berribiyoodku waa xayawaanka** ku nool biyaha iyo berriga labadaba. Rahu marka uu yar yahay wuxu ku nool yahay biyaha. Marka uu koro ayuu biyaha ka baxaa. Wuxu markaas ku noolaadaa berriga iyo hareeraha durdurrada iyo jidhaamaha. Biyaha dhexdoodii mar dambe kuma noolaado.




## UGXAN DABEEDNA RAHA

Sawirradan fiiri.

**Waa ukuntii raha. Ugxantu biyaha ayey ku dhexjirtaa.** Ugxantu marka ay dillaacdo waxa ka soo baxa ilhimii raha. Ilmaha **raha waxa la dhehaa lulumo. Lulumadu waxay ku nooshahay biyaha dhexdooda. Biyaha ayey ka qaadata hawada ku** jirta. Lulumadu waxay cuntaa dhir yar-yar oo biyaha ku dhexjira. Lulumadu waa ay kortaa, maalin kasta waa ay korta.

**Marka ay korto dabada ayaa ka go'da. Maalin walba waa** ay isbeddelaysaa. Waxa ay yeelataa sanbabbo. Waxay lulumdii noqotaa raha. Rahu wuxu leeyahay sanbabbo uu ka neefsado. Rahu markaas wixii ka dambeeya wuxu ku nool yahay berriga.








**Ugxan rah ka soo qaado jidhaan; kiish maro ah ku soo qaado. Dhalo af balaaran biyo kaga soo qaado jidhaanta. Ugxan**tii dhalada biyuhu ku jireen ku rid. Ugxaanta maalin walba fiiri. Maxaa dhacaya? Meel ku qor maalin kassta waxa aad samaysid.

## DHIRTA BIYAHA KA DHEXBAXDA

Fiiri jidhaanta. Dhirta ka dhexbaxaysa magacyadooda ma taqaannaa? Dhir badan ayaa biyaha ka dhexbaxda. Dhirtaas wa**xa ka mid ah dhoomaasha. Dhoomaashu waa dhir biyood. Me**elaha aan biyo lahayn ka ma baxdo, miyaad meelo kale ku arag**tay ? Dhoomaashu waxay ka bixi kartaa uun jidhaamaha biyu**hu had iyo jeer ku jiraan sida kuwa ah webiyada agtooda. Si **fiicaan ayey dhooqada uga baxdaa. Raha ayaa dulfadhiista caleemaha dhoomasha. Waxa jira dhir kale oo biyaha ka dhex**baxda. Dhirtaas oo dhammi biyaha dhexdooda ayey si fiican **uga baxdaa. Biyaha ayaa hoygooga ah.**



## ALJE

Meelaha biyuhu muddo badan ku jiraan, waxa laga yaabaa inaad ku aragtid walax cagaar ah oo biyaha dulsabaynaysa. Walaxda cagaaran waa dhirbiyood, waxa la dhehaa Alje. Sida dhirta kale ma laha xididddo, jirrido, iyo caleemo.

Aljuhu wuxu ku baxaa qorraxda. Aljaha waxad ka heli kartaa meeshii biyuhu fariistaanba. Aljuhu wuxu biyaha ka dhigaa cagaar. Haddii aad heshid weyneysada gacanta ama O-kiyaalo ku fiiri. Dhirtaas aljaha la dhehaa aad ayey u yar-yar tahay. Si fiican looma arki karo ilaa lagu eego weyneysada gacanta. Waa miiqyo dun oo kale ah oo cagaaran.





**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay: biyo, bakeeri weyn. Bakeeriga oo biyo ka buuxa meel cadceed ah dhig. Bakeeriga ku dabool sinxi quraarad ah. Bakeeriga meeshiisa u daa labo ama saddex toddobaad. Maxaa dhaca ?

Maalin kasta biyaha fiiri. Marka biyuhu ay cagaar noqdaan, alje ayaa ka baxaya. Warqad ama maro madow ku duub bakeeriga marka aad alje ku aragtid. Bakeerigii halkiisa u daa toddobaad isaga oo warqaddii ku duuban tahay. Warqaddii ka fur bakeeriga toddobaadka ka dib oo fiiri biyihii. Weli ma cagaarbaa? Haddana mar labaad bakeeriga warqaddii sidii hore ugu duub. Toddobaad dabadeed fiiri. Maxay tijaabadani kuu sheegaysaa ? Muxuu u baahan yahay aljuhu si uu u baxo ?



## DACAARKA

Dhir la dheho dacaar ayaa webiyada iyo durdurrada hareerahooda ka baxda. Daacaarku aad ayuu u dheeraadaa. Haddii meel webi ama durdur leh aad joogtid fiiri dacaarka. Wuxu leeyahay madaxyo buuran oo midabkoodu camaajiir yahay.

Madaxayadaas buurani waa ubaxa iyo iniinyaha dacaarka. Ubaxa dacaarku lama mid aha ubaxa dhirta dugsiga hortiisa ku beeran. Waa dhogor oo kale. Dabaysha ayaa iniinyaha qaadda oo geysa meelo kale. Meelaha kale ayey iniinyihii ku biqlaan oo ka baxaan.

Sidaas ayaa geed kale oo dacaar ihi uga baxaa webigaa ama durdurka dhinacyadiisa.



# BIYAHA HAREERAHEENNA AH

Biyaha waa ayuu u baahan nahay, waa aynu cabbnaa; wax **baynu ku dhaqanaa.**

Biyuhu si fudud ayey cudurrada u fidiyaan. Haddii qof daacuun qabaa uu ka cabbo ama ku dhex qubaysto meel biyo ku jiraan, dadka kale ee biyaha ka cabba ayaa cudurkii qaada. Waxa jira cudurro badan oo laga qaado biyaha aan nadiifta ahayn; waxa ka mid ah cudurradaa kaadi dhiigga. Si aad cudurradaa isaga ilaalisid balliyada iyo jidhaamaha ha ku dhex qubaysan. Marka aad qubaysanayso biyaha weel ku qaado, dabadeed meel jidhaanta ka fog ku qubayso.







## DARUURTA

Hadda cirka fiiri dhawr miridh. Daruur ma ku aragtaa. Sidee **ayey daruurtu u eg tahay ? Daruurtu ma soconaysaa ?**

Aroor kasta cirka eeg, duhurkii iyo galabtiina eeg. Fiiri **daruurta. Maalin kasta cirku daruur ma leeyahay ? Bilahee ayuu daruur badan leeyahay ? Cirka oo dhan daruurtu ma wada** qarisaa ? Qorraxda maalin kasta ma aragtaa ?

Carruur ayaa cirka fiirin jirtay, waxay arkeen cirkii oo sida sawirka u eg. Weli ma aragtay cirka oo sidaas oo kale ah? Maxaa dhaca marka cirku sidaas noqdo?

## JAADADKA DARUURTA

Haddii aad maalin kasta cirka fiirisid waxad arkaysaa **daruur. Daruurtu miyay isu wada eg tahay ? Daruurtu isuma** wada eka. Waxa jira saddex jaad oo daruur ah. Mid waliba **magac gaar ah ayey leeyahay. Waxa la kala dhahaa daruur baal ah, daruur caad ah; iyo daruur dhool ah. Daruurta baalka ihi waa ay caddahay, waxay u egtahay baalka shimbiraha, fiiri sawirka.**



**Daruurta caadka ihi waxay** qarisaa cirka oo dhan; waxay **u eg tahay qiiq. Fiiri sawirka.**





**Daruurta dhoolka ihi waa ay buuran tahay. Xaggeeda hoose waa uu isku siman yahay. Cirka sar ayaa lagu arkaa. Daruurtu waxay u egtahay buur yar. Fiiri sawirkan.**



## URURINTA WARKA.

Maalin kasta marka aad fiirisid cirka wixii aad ku aragtid meel ku qor. Waxad buugga ku qortaa ayaanta magaceeda, taariikhda bisha iyo sannadka. Buug gooni ah oo wixii aad maalintii cirka ku aragtid aad ku qortid samayso.



Taariikh :- 1[dii] Luulyo
Daruurta : baal

Fiiri sawirkan. Daruur ayaa ku sawiran. Sawirku wuxuu tusayaa daruur; sidaas oo kale u sawir daruurta aad cirka ku aragtid. **Sidan oo kale buuggii u geli.**



Taariikh : 26[kii] June
Daruurta Dhool



## DARUURTU WAA MAXAY?

**Daruurtu waxay ka samaysan tahay dhibco yaryar oo biyo** ah. Dhibcuhu hawada ayey sabbaynayaan. Marka Fallaaraha arraxdu ay ku dhacdo; ayey iftiimiyaan daruurta. Daruurtu caddaan ayey noqotaa. Sidee ayey daruurtu u sameysantaa?


Aynu baarno sida daruurtu u sameysanto. Si aynu u ogaanno waa inaynu barannaa **uumibaxa** iyo **haarowga.** Hore ma u maqashay ereyadaa?

**Tijaabooyinka ayeynu ka baran doonaa waxa ay yihiin.**

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay: biyo, maro, iyo sabuurad. Marada biyaha ku qoy. Maradii sabuuradda mari, fiiri waxa dhaca. **Maxaa dhacay?**

Sabuuraddii waa ay qallashay. Biyihii waxay galeen hawada. Biyaha baaba'aya waxa la dhahaa uumibax. Biyihii waa ay uumibaxeen. Biyaha ma arki karno marka ay uumibaxaan. Biyaha hawada ku jira waxa la dhahaa uumibiyood. Uumibiyood ayaa ku jira hawada kugu wareegsan. Ma arki kartid.



**Tijaabo :**

Waxa aad u baahan tahay laba digsi oo yaryar, iyo laambad, qaaddo yar. Labada digsi midba ku shub qaaddo biyo ah. Digsi lambadda oo [illegible] ku kululay. Digsiga kale meel kale dhig. Fiiri digsiga ay biyuhu ka hor uumibaxaan.



Biyuhu waxay ka hor uumibaxaan digsigii la kululeeyay. Kulku wuxu dedejiyaa uumibaxa. Biyaha kulul ayaa ka hor uumibaxa kuwa qabow.



**Biyuhu waxay ka uumibaxaan webiyada, harooyinka,** iyo badaha. Qorraxdu waxay bixisaa kul. Kulkaa qorraxda ayaa **biyaha uumibixiya. Biyaha webiyada, harooyinka iyo baduhu waxay noqdaan uumi.**

**Tijaabo :**


**Waxad u baahan tahay: baraf; daasad. Taabo daasadda dusheeda.** Waa ay engegan tahay. Baraf ka buuxi daasadda. Taa**bo daasadda dusheeda. Ma engegan tahay? Barafku wuxu qaboojiyaa daasadda. Uumibiyoodka ku jira hawada ayaa qabooba marka uu taabto daasadda qabow. Uumibiyoodkii wuxu isu geddiyaa dhibco biyo ah oo aynu arki karno. Biyuhu marka ay isu geddiyaan uumi ma arki karno, marka uumigu biyo isu geddiyo waa aynu arki karnaa. Marka uumigu uu biyo isu gediyo waxa la dhehaa waa hooroobay.**



## DARUUR FASALKA DHEXDIISA AH

Waxad ku samayn kartaa daruur fasalka dhexdiisa. Waxad u baahan tahay: koob, biyo, baraf, baaquli quraarad ah, iyo dab.

Koob biyo ah ku shub baaquliga. Baaquliga dabka saar. Biyaha kululay. Yay karin. Ka qaad baaquliga dabka. Dabool. Daboolka dushiisa barafkii saar. Uumibiyood ayaa ka buuxsamaya biyaha dushooda. Kulka ayaa biyaha uumibixinaya. Barafkii ayaa qoboojinaya uumibiyoodkii. Uumibiyoodkii wuu hooroobaa, wuxu noqdaa dhibco biyo ah. Dhibcihii biyaha ahaa waxay ku sameeyaan daruur baaquliga dhexdiisa. Waxad aragtaa daruur.






## ROOBKU WUXU KA YIMAADDAA DARUURTA

Fallaaraha qorraxdu waxay ku dhacaan daruurta. Qorraxdu waxay iftiimisaa dhibcaha biyaha ah ee daruurtu ka samaysan tahay. Daruurtu markaas waxay noqotaa caddaan. Weli ma aragtay daruur madow? Mar mar ayey daruurtu madow noqotaa. Daruurtu waxa ay madoobaataa, marka dhibcihii biyaha ahaa ay weynaadaan. Marka ay qaboobaan dhibcuhu waa ay sii weynaadaan.

Dhibcaba biyaha ah ee waaweyni waxay celiyaan fallaarihii qorraxda ee ka dusayey. Waxay sameeyaan hadh. Daruurtii markaas waa ay modoobaataa.

Dhibcaha biyaha ee ku jira daruurta madow waxa micnaheedu yahay dhibcihii ayaa waaweynaaday. Dhibcaha biyuhu haddii ay aad u weynaadaan, hawada ma dhex sabbayn karaan. Waxay ka soo daataan daruurtii. Daruurta madow ayaa roobku ka yimaaddaa. Mar mar roobkii oo da'aya ayeynaan arkin daruurta. Daruurtii waa ay fogtahay. Dabaysha ayaa soo qaaday dhibcihii.


Roob ayaa da'aya. Roobkii wuu qaadi waayey. «Roob yahaw qaad aan dugsigii tagnee xaggee waxa aad oo biyo ihi ka yimaadaan». Sidaas ayeynu dhehnaa marka roobku joogsan waayo.

**Xusuuso biyaha waxay ka uumibaxaan badaha. Uumigii biyuhu wuxu ku darsamaa hawada. Uumibiyoodkii hawada ku jiray wuu hooroobaa.**

**Wuxu noqdaa daruur. Roobka ayaa daruurta ka soo daata. Biyihii roobku waxay ku dhacaan dhulka, togagga iyo webiyada ayey raacaan. Webiyadii, badda ayey galaan. Biyihii waxay ku soo noqdeen meeshii ay ka tageen. Waxa la dhehaa biyihii waa ay soo wareegeen; ama wareeg ayey sameeyaan.**

Wareeggu waxa weeye marka meeshi aad ka bilowday **socodka aad ku soo laabatid. Biyuhu waxay ka tagaan baddaha iyaka oo uumi ah.**

Waxay ku soo noqdaan baddii markaasna waxa la dhehaa **meertada biyaha.**





**Biyaha aynu Cunno.**


Waxa laga yaabaa inaad qoslaysid marka aad akhridid madaxa caharka. Biyaha waa la cabbaa ee lama cunno. Waa run. Waxase jira biyo la cuno. Weli ma yaabsan tahay. Waxad cuntaa mafafay (Babay), canbe, yaanyo, iyo liin. Haddii aad tuujisid waxa ka yimaadda dheecaan. Dheecaankaas biyo ayaa ku jira. Dhirta oo dhan biyo ayaa ku jira. Xayawaanka oo dhan biyo ayaa ku jira. Waxa nool oo dhan waxa jirkooda intiisa badani ka samaysan yahay biyo. Marka aad cuntid khudradda, hilibka, caanaha, waxa aad cuntaa biyo.

**Biyaha ku jira mafafayga.**

Mafafayga biyo badan ayaa ku jira. Xaggee biyahaasi uga yimaadaan ? Bal hadda aan raacno dhibic biyo ah. Marka roob ku da'o geedka mafafayga hareerihiisa, dhibco badan baa ku dhaca agtiisa. Dhibcahaasi carrada ayey hoos u ga**laan.**

Marka ay carrada hoos u gelayaan ayey la kulmaan xididdada geedka. Xididdada geedku waxay leeyihiin xididdo yar-yar oo timo oo kale ah, xididdadaa yar-yar ayaa dhibcihii nuuga.

Biyaha ayaa geedka kor u raaca oo gaara laamaha iyo caleemaha. Geedka ayaa ku kora biyaha oo miro bixiya.




Mirahaas ayaa dadku cunaa. Sidaas oo kale ayaa dhirtu biyaha u wada heshaa.

Biyo badani mafafayga ma ku jiraan ? Raadi adigu oo tijaabadan samay. Waxa aad u baahan tahay: xabbad mafafay ah, mindi, miisaan, iyo sinxi.

Xabbadda mafafayga ah miisaan. Ooro miisaankeeda Mafafayga qurub dabeedna sinxiga ku gur. Sinxiga meel cad-ceed ah dhig. Meeshiisa u daa shan casho. Biyihii ku jiray mafafayga ayaa ka baxaya. Mafafaygii aad qallajisay miisaan soona saar miisaankii biyihii ku jiray mafafayga.


Xisaab ahaan ku soo saar jajabka ay biyihu ka noqonayaan miisaanka mafafayga.







## BIYUHU WAX BAY MILAAN

Nin ayaa wuxu lahaa dameer. Dameerku wuxu ahaa mid fariid ah. Qofna ma kaxayn jirin. Marka la raro ayuu keligii alaabta guriga geyn jiray. Maalintii dambe ayaa ninkii wuxu dameerkii ku raray laba jawaan oo milix ah. Dameerkii oo gurigii ku socda ayaa arkay jidhaan biyo ah. Biyihi buu isyiri ka cab. Jidhaantii ayuu ku dhacay. Markii uu ka soo baxay, ayuu wuxu dareemay culayskii uu siday oo fududaaday. Maalin kasta marka milix lagu soo raro ayuu jidhaanta dhexgeli jiray. Markaas ayaa culaysku ka yaraan jiray. Maxay sidaasi u dhacday? Muxuu culayskii u fududaaday? Aan baarno waxa dhacay. Tijaabdan ayaa ina tusaysa waxa sidaasi u dhacday.







**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay: kuumi, jab quraarad ah, qori yar, qaaddo milax ah, iyo qaaddo sonkor ah. Iyo shan bakeeri oo biyo ah.

Alaabada aad soo ururisay midba bakeeri biyo ah ku rid. Meel ammaan ah dhig. Maalin kasta fiiri. Alaabadii kuwee ayaa weli biyihii ka dhex muuqda ? kuwee ayaan muuqan ? Milix-dii iyo sonkortii ma muuqdaan ? Biyihii ayey dhexgaleen. Bi-yaha dhadhami. Milixdii iyo sonkortii ma ka dhadhamayaan.

Waxa la dhehaa milixdii iyo sonkortii waxay ku milmeen biyi-hii. Biyihii waxay mileen sonkortii iyo milixdii. Xusuuso skeekadii dameerka. Maxaa culayskii uga fududaaday dameer-kii markuu biyihii ku dhexdhacay ?

Roobku marka uu da'o biyahu waxay galaan carrada. Carrada waxa ku jira waxyaalo milma. Marka biyuhu ay car-rada gelayaan waxa ku milma waxyaalo badan. Biyihii carrada galay waxa ay la kulmaan xididdada dhirta. Xididdada dhirtu waxay soo nuugaan biyaha iyo waxyaalihii ku milmay.

Dhirtu waxay cuntadeeda ka samaysataa biyahaas iyo waxayaalaha ku milan. Dhirtu waa ay kortaa oo waxay ku kor-taa cuntadaas ay samaysatay. Xayawaanku wuxu cunaa dhirta. Dadku wuxu ku nool yahay dhirta iyo xayawaanka.



## DIYAARINTA SHAAHA

Weli ma aragtay hooyadaa oo shaah diyaarinaysa? Ma-xay samaysaa ? Bal berri fiiri sida ay u diyaariso. Waxay soo qaadataa: kidhli, biyo, sonkor, caleen shaah, iyo dab. Biyaha ayey kidhliga ku shubtaa; dabadeedna dabka ayey saartaa. Marka biyuhu kululaadaan ayey sonkorta iyo shaaha ku shub-taa.

Maxaa shaahu ka samaysan yahay? Biyo; sonkor iyo caleen sha-ah. Maxaa biyaha loo kululeeyaa? Miyaa la isku daro biyaha, sonkorta iyo shaaha; dabeedna la cabbo. Tijaabooyinkan samay.

Waxa ay ka jawaabi doonaan su'aalahaas.

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay labo qaaddo oo sonkor ah iyo labo bakeeri. Biyo kulul iyo biyo qabow. Labada bakeeri midna bi-yo kulul ku shub midna biyo qabow. Bakeeri walba qaaddo sonkor ah ku shub. Fiiri sonkortii ta hor milanta. Sonkortii bi yaha kulul ku jirtay iyo tii biyaha qabow ku jirtay teebaa hor milantay ?


Xusuuso sidii shaaha loo karinayey. Maxaa biyaha loo ku-luleeyey ? **biyaha kululi dhaqso ayey wax u milaan.**

## MUXUU MARKABKU U SABBEEYAA ?

Weli ma aragtay markab. Markabku wuxu ka samaysan yahay xadiid. Isaga iyo musbaarku waxay ka wada samaysan yihiin xadiid. Muxu markabaku u sabbeeyaa. Aynu baarno.

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay, labo daasadood oo isle'eg oo madhan; iyo baaldi biyo ah. Labada daasadood midkood kala dillaaci. Marba mid biyaha ku rid. Teebaa degtay? Teebaa sabbaysay ? Labada daasadood waa isku culays, maxay midina u degtay midina u sabbaysay ? Haddii shay qaabkiisa la beddelo wuu sabbeeyaa. Daasadda hawo ayaa ku jirta oo fududaysa. Markabku wuxuu leeyahay qolal hawo ku jirto. Hawada ayaa fududaysa.





## WAXYAALAHA BIYAHA NUUGA

Nin reer miyi aha ayaa magaalo yimid. Aad ayuu u gaajooday, waayo maalintii oo dhan ayuu soconayey. Reer miyigu aad ayuu u socdaa. Baabuurro ma laha. Marka uu meel tegayo wuu lugeeyaa. Walaashaa ama walaalkaa weydii wuxu ku soo arkay miyiga, markuu ka qayb galay ololaha reer miyiga. Sheekooyin badan oo fiican ayuu kuu sheegi doonaa.

Ninkii reer miyiga ahaa wuxuu yimid maqaayad. Wuxu gatay xabbad rooti ah iyo koob shaah ah. Rootigii ayuu koobkii shaaha ahaa geshay. Markii uu rootigii ka soo saaray koobkii, ayuu arkay shaahii oo eber ah. wuu yaabay, wuxu u wacay ninkii maqaayadda lahaa wuxu ku yidhi, «Waar rootigu waa ooman tahay ee maxaad u waraabin weydeen». «Ha haa haa».

Ninkii ayaa ku qoslay. Maxaa dhacay ?

**Tijaabo :**

Waxad u baahan tahay, xabbad rooti ah. Xabbadda rootida ah kala goy. Fiiri rootida gudaheeda, maxaad ku aragtaa ?

Daldaloollo yar-yar ayaa rootiga dhexdeeda ah. Daldaloolladaas ayaa biyuhu galaan. Wixii biyaha qaataa waxay leeyihiin daldaloollo ay biyuhu galaan. Waxyaalo kale oo biyaha nuuga ma taqaan? Fiiri inay daldaloollo leeyihiin.

## CUNTADA

Nooluhu wuu koraa; wuuna dhaqdhaqaaqaa. Wuxu u baahan yahay cunto uu ku koro. Cunto uu ku dhaqdhaqaaqo.

Dhirtu cuntadeeda waa ay samaysataa. Waxay ka samaysataa biyaha iyo hawada. Xayawaanku cunto ma samaysto. Wuxu cunaa dhirta. Xayawaanka qaar ayaa xayawaanka kale cuna.

Bisaddu maxay cuntaa ? Libaaxu muxuu cunaa ? Rahu muxuu cunaa ? xayawaanku marka uu dhinto, carrada ayuu ku darsamaa. Dhirtu waxay ku baxdaa carrada. Sidaas ayaa cuntadii u wareegtaa. Dhirtu carrada ayey ka baxdaa. Dhirta xayawaankii cunay xayawaan kale ayaa cuna. Xayawaankii markuu dhinto carrada ayuu ka mid noqdaa. Wareeggaa waxa la dhehaa silsilada cuntada. Silsiladda ma taqaanaa ? Sida silsiladda ayey cuntadu isugu xiran tahay.






## WAXAYNU U BAAHAN NAHAY CUNTO

Cunug yar ma walaala tihiin ? Intuu le'eg yahay ? Saw kama dheerid ? saw kama buurnid ? Weligii ma sidaas ayuu ahaanayaa? Maya. Wuu dheeraanayaa, wuu buurnaanayaa ama wuu korayaa. Adigu marbaad isaga le'ekayd. Waa aad kortay.

Dadku wuu koraa. Xayawaanka kale wuu koraa. Dhirtu way kortaa. Noolaha oo dhami wuu koraa. Dadku si uu u koro wuxu u baahan yahay cunto. Dadku hawl badan ayuu qabtaa.


Kubbad ayuu dheelaa. Wuu socdaa. Si uu hawlahaas u qabto wuxu u baahan yahay cunto.




Xaggee bay cuntadeennu ka fimaaddaa? Xusuuso wixii aad maanta cuntay. Maxay ahaayeen ? Sheeg inta dhirta ka timid iyo inta xayawaanka ka timid.



Cunto kala jaad ah ayeynu cunnaa. Cuntada qaarba shaqo **qura ayey qabtaan. Weli ma aragtay daar la dhisayo? Daarta** waxa laga dhisaa dhagaxaan ama leben. Carrada lagu dhisayo waxa lagu qooyaa biyo. Dariishadaha iyo irridaha xadiidka ku jira waa la ranjiyaa. **Ranjigu wuxu ka ilaaliyaa daxalka. Sidaas** oo kale **ayaa cuntada kuwaba shaqo gooni ah u qabtaan. Cuntada qaar ayaa jidhku ku koraa. Waxa ka mid ah cuntadaas jidhku ku koro hilibka, ukunta, kalluunka, caanaha, digirta, iyo lawska. Cuntada qaar ayaa jidhku ku shaqeeyaa oo uu ku dhaqdhaqaaqaa sida xaabada dabku ugu baxo. Cuntadaas waxa ka mid ah: bariiska, galleyda, burka, baradhada, baastada iyo haruurka.**




**Cuntada qaar ayaa caafimadka qofka ilaaliya, oo cudurada ka celiya. Cuntadaas waxa ka mid ah, saladhka, yaanyada, kaabajka, dabacasaha iyo baqalka.**



**Haddaba si aad u kortid, u caafimaad qabtid, oo aad u shaqaysan kartid, waa inaad saddexda jaad ee cuntada aad miba wax ka** cuntaa.





Cuntada la cunayaa haddii anay nadiif ahayn waxa ay keentaa jirro badan. Qofku haddii uu jirran yahay shaqo ma qaban karo, mana ciyaari karo. Wuxu noqdaa qof aan waxter lahayn. Isaga ayaa u baahan in loo shaqeeyo. Waa in la ilaaliyaa nadaafadda cuntada. Waa in cuntadu marka hore ay nadiif ahaataa. Weelka lagu ridyaa waa inuu nadiif ahaadaa. Qofka diyaarinaya iyo qofka cunayaba waa in gacmahiisu nadiif ahaadaan.



**Gacmahaaga aad u dhaqo marka aad rabtid inaad cuntaysid. Cuntada aan la karin sida saytuunka, iyo murcoodka inta aanad cunin biyo ku dhaq. Marka cuntadu afka kuugu jirto ha hadlin, hana qoslin. Haddii aad rabtid inaad hadashid horta cuntada afka kuugu jirta liq. Marka aad cuntaynaysid in yar in yar qaado. Cuntada aad u calali, marka aad jilcisidna liq. Marka aad cuntada dhamaysatid gacma dhaqo, dabeed maro nadiif** ah ku qallaji afka iyo gacmahaba.



# NADAAFADDA DUGSIGA, GURIGA IYO XAAFADDA

## D U G S I G A

Aroorta hore ayaad toostaa, ilkahaaga ayaad cadaydaa dabadeedna waa aad qubeysataa. Buugaagtii ayaad markaa diyaarsataa dabeedna waa aad quraacataa. Dugsiga ayaad qabataa. Waxad timaaddaa dugsigii oo hortiisii la rusheeyey; fasalkii oo la xaadhay, iyo miisaskii oo la masaxay.

Fasalku waa nadiif. Yaa nadiifiya dugsiga? Markii aad huruday ayaa qof nadiifiyey. Qofkaasi waa ayo? Adeegaha dugsiga magaciisa ma taqaannaa ? Waa inaad adiguna dugsiga nadaafaddiisa ilaalisaa. Dadku waxay jecel yihiin inay meel nadiif ah joogaan.

Meelaha wasakhda ah waa lagu jirradaa.

Sidee baad dugsiga nadiif uga dhigi kartaa ?


Marka hore miiskaaga nadiif ka dhig. Buugaagta si fiican u rasay. Marba buugga aad wax ku qoranaysid ama aad akhriyaysid la soo bax. Fasalka waxa yaalla kolay waraaqaha lagu guro.

Warqaddii aanad rabin ku rid. Waraaqaha ha ku tuurin fasalka dhexdiisa.
Fasalka dhexdiisa waxba ha ku cunin, maqaayadda dugsiga





**ku cun. Haddii aad warqad fasalka ama dugsiga dhextaalla** aragtid, ka qaad, ku rid **kolayga qashinka.**



**Musqusha dugsigu meesha ay tahay ma taqaannaa?**

**Marka aad u baahatid si fiican ugu kaadi, godka saxarada la eego.**

**Dhinacyada ha kaga saxaroon haddii ay biyo leedahay biyaha ku fur. Haddii musqushu** god tahay daboolka saar. **Marka aad ka soo baxdid faraxalo.**

## GURIGA

**Guryaha waa la seexdaa, cuntada ayaa lagu karsadaa.**

**Dadku waxay jecel yihiin inay ku noolaadaan guryo nadiif ah.**

**Guryaha aan nadiifta ahayn waxa ku dhasha baranbaro, diqsi,** kaneeco iyo kutaan. Cayayaankaasi waxay keenaan jirro. Hooyadaa ayaa maaaalin kasta guriga xaadha, sariiraha ayey gogoshaa guriga ayey nadiifisaa.

**Adiguna guriga nadiifi, sariiraha marka aad koraysid sii** cagamaydho. Musqusha si fiican ugu fadhiiso.

Marka aad cuntada cunaysid ha ku daadin guriga dhexdiisa.

Lafaha, diirka muuska iyo babayga ku rid tenegga qashinka. Meeshii aad ku aragtidba baranbarada dil ha u ogalaan inay gurigiina ku noolaato.

## XAAFADDA


Guriginna, guryo kale ma u dhow yihiin? Haddii uu guri giinnu nadiif yahay oo guryaha idiin dhow, aanay nadiif ahayn duqsigii ayaa gurigiinna soo gaadhaya. Markaa qashinka ha ku daadin guryaha kale ee agtiinna ah, qashinka waxa la geeyaa meelaha loo sameeyey ee lagu ururiyo.

Ha ku dhex ciyaarin meelaha guddaafadaha ah ee qashin ka **lagu qubo. Haddii kale wasakhdaas ayaad cudur ka qaadaysa. Yaa xaafadda qashinka ka gura ? Waddooyinka iyo** suuqyada yaa nadiifiya? Dhirta waddada ku taalla ee quruxda **badan yaa waraabiya ?**

Baabuurada qashinka lagu qaado ma aragtey? Waa ay **daboolan yihiin. Wax laga ilaalinayaa inaan qashinku ku daadan magaalada dhexdeeda. Qashinka marka la ururiyo** ayaa god lagu gubaa.

**Dawladda hoose magaalada ayey nadiifisaa, adiguna xafa**ddaada nadiifi. Ha ku saxaroon meel aan musqul ahayn. Haddii qof jirrani uu meel aan musqul ahayn ku saxaroodo; saxara**diisa ayaa duqsiga iyo baranbaradu ku joogsadaan. Marka baranbaradii iyo duqsigii cunto ay ku joogsadeen uu qof cuno;** wuu jirradaa.

Dad badan ayaa caafimaadkaaga ka shaqeeya. Adeegaha **dugsiga; hooyadaa; dawladda hoose. Adiguna nadiifi dug**sigiinna, gurigiinna, iyo xaafaddiinna. Nadaafadda iyo jirradu waa col. Wasakhda iyo jirraduna waa saaxiib.





## CUDURRADA LA KALA QAADO

Cudurrada qaar ayaa dhaqso loo kala qaadaa. Qaarkood haddii qof qaba la taabto ayaa laga qaadaa waxa ka mid ah furuqa.

Fiiri sawirkan. Dadka furuqu ku dhaco sidaas ayey noqdaan.

**Furuqu si aanu dadka ugu** dhicin waa laga tallaalaa. Tallaalka ha diidin cudurkaas ay**uu ka ilaalinayaa.**





Cudurrada dhaqso loo kala **qaado waxa ka mid Daacuun**ka. Daacuunka isna waa la iska tallaalaa. Daacuunka wa**ad iska ilaalin kartaa haddii aad gacmahaaga biyo iyo saa**buun ku dhaqdid, marka aad rabtid inaad wax cuntid **Had iyo jeer weel dhaqan wax ku cun.**

**Cuntada dabool si aan diqgsi iyo wasakhi ugu dhicin.**

Qofka cudurrada la kala qaado qaba; looma dhowaado waxbana lalama cuno.

Cudurrada dadku kala qaado ee dadka had iyo jeer ku dhaca waxa ka mid ah durayga.

**Haddii duray kugu dhaco cusbataalka qabo. Dugsiga ha** iman adoo duray qaba. Haddii kale waxad qaadsiinaysa **ardayda kale.**





**Dawooyinka lagu siiyo ha diidin ee qaado. Waxa laga yaabaa in dawadu qaraar tahay,** ama irbaddu xanuun leedahay. **Ha ka cabsoon, waa aad ku bogsanaysaa.**



**Marka aad durayga qabtid, qaado masar ama maro dhaqan oo ku siinso.**

Meelaha dadka badani isugu yimaaddo: dugsiga, shaneemada, **baska, guriga, candhuufo ha ku tufin. Can**dhuufada masarka ku tuf.

**Masarka biyo kulul iyo saabuun ku dhaq.**

